MAJALADDA MARAG
Cadadka 15-aad | June 2026

# SOOMAALIYA IYO JAMHUURIYADDA SADDEXAAD:

## BURBUR MISE BISLAANSHO SIYAASADEED?


Cabdullaahi Cabdi (Cabdullaahi Dheere)

Bogga: 8




Xigashada Sawirka: AI

# Qorayaasha Majaladda



**Dal qalaad iyo da'yarta Soomaaliyeed:** Dugulka Soomaali baad mooddaa misna waa duul kale! (Qaybtii 1-aad)
Cabdiweli Axmed Muumin — 4


**Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Saddexaad:** Burbur mise Bislaansho Siyaasadeed?
Cabdullaahi Cabdi (Cabdullaahi Dheere) — 8


**Dhan Mise Dhimman? Siyaasadda Waxbarashada Puntland (Qaybta 1-aad)**
Bashiir Suuley — 12


**QAADKA IYO SAAMAYNTIISA BULSHADA:** dhibaatada taagan iyo baahida wacyigelineed - **qeybta 3aad**
Dr. Cabdinaasir Jaamac Warsame — 16


**Qaran-Jabkii Soomaaliya:** Saamayntiisa Dhallinyarada iyo Rajada Mustaqbalka
Cabdijabaar Maxamed Farma — 20


**Dastuur Mise Hoggaamiye?** Marka Hay'aduhu Daciifaan oo Taladu ku Ururto Hal Qof
Zakaria Xaaji Axmed Iley Rabiica — 24


**Shiikh Madar Axmed Shirwac (1825–1918)**
Dr. Cabdiraxmaan Baadiyow — 28


**Garsoorka Soomaaliya ee Saddexda Tiir Ku Taagan**
Maxamuud Bashiir Jaamac (Mawel) — 31


**Sababaha dhaliyay Calmaaniyadda Qeybta 2-aad**
Dr. Maxamed Cali Faarax — 34


**Siriqda Siyaasadda Soomaaliya**
Maxamed Xasan Cirro — 40


**Maarshaalka Garashada**
Maxamed Cali Adan (Hoorri) — 44

# Dhambaalka Tifaftiraha

Waxaa farxad iyo bogaadin mudan in aan soo saarno cadadka 15-aad ee Majalladda Marag, oo ah madal warbaahineed oo loogu talagalay in lagu daabaco macluumaad kala duwan sida warbixino, falanqayno, iyo aragtiyo ay diyaariyeen dad kala duwan oo ka tirsan bulshada, sida cilmi-baarayaal, suxufiyiin, aqoonyahano, hal-abuurro, iyo dadka kale oo khibrad iyo aqoon u leh dhinacyada kala duwan ee taabanaya nolosha bulshadeena.

Majaladan ujeedkeedu waa in la helo madal ka duwan warbaahinta dalka ka jirta, kuwaas oo inta badan xoogga saara soo tebinta dhacdooyinka maalinlaha ah. Majalladdan waxay hiigsaneysaa inay bulshada u gudbiso macluumaad dhigaal noqda, waxtar leh oo kor u qaada wacyiga iyo fahamka bulshada, kobciya doodaha iyo aragtiyaha caafimaadka qaba, soo bandhiga dhaliilo wax dhisaya oo daahfuran, islamarkaana dhiirrigeliya bulshada gaar ahaan dhallinyarada, si ay u noqdaan kuwo xog ogaal ah, si buuxda u fahma xaaladda dhabta ah, una gaari karaan go’aammo sax ah oo noloshooda iyo bulshada wax ku ool u ah.


Marag waxay ka madax-bannaan tahay aragtiyaha siyaasadeed ee kala duwan ee dalka ka jira, waxayna u furan tahay qof kasta oo doonaya inuu bulshada la wadaago fikrado, warbixino iyo falanqayno ku salaysan aqoon, cilmi iyo waayo-aragnimo.

Cadadkan 15-aad qormooyinka xiisaha leh ee ku jira waxaa ka mid ah qormooyin ka hadlaya siyaasadda Soomaaliya, taariikhda, garsoorka, waxbarashada, arrimaha dhallinyarada, iyo saamaynta qaadka, kuwaas oo ay qoreen aqoonyahanno iyo qoraayaal Soomaaliyeed oo kala duwan.

**Cabdi Cumar Bile**
Tifatiraha Guud

# DAL QALAAD IYO DA'YARTA SOOMAALIYEED:

## DUGULKA SOOMAALI BAAD MOODDAA MISNA WAA DUUL KALE! (QAYBTII 1-AAD)




Cabdiweli Axmed Muumin




Xigashada Sawirka: AI

# ARAR

Intaynaan dulucda hadalkeenna tiimban, bal aynu waxoogaa dib u noqonno oo aynu dib u majiiranno dadkeenna iyo hiddihiisa dhaqan, iyo weliba kiisa diimeed. Soomaalidu waa dad Islaam ah oo lagu tilmaamo inay ka mid yihiin dadyowga Islaamka ah ee duugga ah, diintuna ay biyadhigatay. Waxaa weliba ay taariikh-yahannadu sheegaan in Soomaaliya islaamnimadu soo gaadhay iyadoon weli Madina, Xaramka labaad ee Islaamka gaarin; oo waatii asxaabtii Nebigu, muuno iyo nabad korkiisa allaha yeelee, qaarkood magangaleen dal-weynihii la oran jirey Xabasha ee isaga diinta Nasaarada laga haystey xilligaasi, uuna hoggaankiisa hayey boqorkii Islaamay gadaashii ee Najaashi, oo isagu haystey haraadigii diintii Nebi Ciise ee dhabta ahayd, intii aysan doorsoomin. Dhacdadan ayaa ahayd ka hor intii aysan Muslimiintu degmeysan Madiina.

Waxaan uga socdaa Soomaalidu waa Islaam guuna. Hase ahaatee, waxaa sidoo kale taariikhdu ay sheegeysaa, ugu yaraan kun sano ka hor xilligan haatan la joogo, inay reer miyi ahaayeen, reero qabiillo ka koobana ay ahaayeen, welina sidii bay u yihiin amaba ugu badan yihiin. Inkastoo badankeedu haatan 'magaalaysatay' oo ay 'daaro' dhisteen, haddana reer-magaalnimadoodu waa dheeha sare ee weli dadku dhuuxa waa ka reer miyi, intiisa badan aynu niraahno: waana arrinta keeneysa inay xaal magaalo iyo maamul ku heshiin weydo, illeen weli waxay xagga bissaylka ka maraysaa 'waa ku necebahay', 'intuu hebel haysan lahaa ha la waayo,' iyo aragtiyo gaagaaban oo kuwaas lamid ah.

Dadyowga adduunka markaad fiiriso, waxaa loo kala saari karaa, duuduub ahaan saddex qaybood: bulso reer-magaalnimo asal u tahay oo fadhiid ah, madow, caddaan, ama maarriin, kay doonto ha ahaatee, leh ilbaxnimo sal dhigatay, magaalooyin hirgalay, talo bulsho oo hannaan fadhiya leh, iyo kayd aqooneed oo bulshada caqligeeda bisleeya. Kuwo kale, beelo reer-miyinimadu ay saldhig u tahay oo ma-deggan ah ama reer-guuraa aysan nolol-maalmeekeedu fadhiyin, wax ka fog iska daaye, iyo ugu dambayn, beel boqolkiiba toban ama shan iyo toban ay reer-magaal ama reer-miyi ka tahay.

Aan raacinnee, dal kasta waxaa dadkiisa waayeel iyo dhawrto u ah dawladdiisa: iyadaa wixii dayac ah ee bulsho ahaan waxyeellayn kara, marka laga hadlayo diinteeda, nafteeda, dhaqaaleheeda, iyo dhaqankeedaba, ka ilaalisa oo hoga-tusaalaysa. Qaabaka ay dawladdu wax u ilalaiso waxaa ka mid ah inay 'irdaha' daka looga soo dhici karo dhawrto u samayso, booliis, askar, sirdoon, sida xuduudaha waddanka, gegida diyaaradaha, dekedaha, iyo meeshii kaloo u nugul 'in reerka looga soo dhoco'. Arrintaani waa midda keentay in adduunku samaysto dal-ku-gal ama 'baasaboor', noocuu doono ha ahaadee, si looga warqabo dadka qalaad ee soo gelaya dalka, si loola socdo dhaqdhaqaaqooda, iyo weliba ciddii deegaana oo dalka ka baxaysa, si looga warhayo oo dawladdu ay uga ilaaliso wixii waxyeello ah oo ku dhici kara, amaba ay u soo jiidi karaan dalka iyo dadka, sida jaajuus, cadow, kw, kas iyo kama'ba say doontaba ha ku dhacdee. Si kale haddaan u dhigno, dal kasta dawladdiisaa waayeel u ah, dadkana way ilaalisaa, gaar ahaan nugulkiisa iyo maxaska: dawlad-la-mood ma sheegeyno hadde; dawlad qumman baa u soconnaa.

# QARAN-JABKII SOOMAALIYA

Soomaaliya goortay ka duntay dawladdii dhexe, maxaa ku dhacay dadweynihii; maxaa ku dhacay nugulkiisii; maxaa ku dhacay danyartiisii; maxaa ku dhacay kas-gaabkiisii aan isku filnayn; maxaa ku dhacay maatadii; maxastii iyo bir-ma-geydadii maxaa ku dhacay. Intii Soomaalidu dhexdeeda iska laysay marka laga yimaado, waxaa ku dhacay dayac; waxaa ku dhacay hoog iyo halaag; waxaa hareeraha uga soo galay nacabkiisii, isagoo miciyaha u lisanaya. Gabadhii gaaarida ahayd gun baa saloolatay, markaasay fagatay; gaal baa gacan-togaaleeyey. Way gaajootay; way baahatay, si kasta oo loo baahdo. Gayaankeedii waa le'day. Gurigeedii waa gubtay. Gunnimo buuxda baa usoo hoyatay.

Qaranjabkii kadib, Soomaalidu waxay u dagaagtay adduunka oo dhan. Habqankeedii wuxuu gaaray meel kasta oo aadane, mid liita iyo mid ladanba, dego, gaal iyo Muslimba. Haddiiba waxay ku butaacday Soomaalidii isasoo dishayi dalalkii nacabka u ahaa ee horraantiiba hagardaamada u geystey; waxay dhoobteen xuduudaha Kiinya iyo Itoobiya, iyagoo tabaalaysan oo arradan, misana is-hiifaya! Waa war qaawan oo la wada ogyahay. Waatii xeryaha qaxootiga loo ooday. Waxaa ka mid ahaa kuwii caanka baxay 'Otaanga' iyo 'Majeengo' ee ku yaalley magaalo-xeebeedka Kiinya ee Mombasa. Boqollaal kun oo qof baa lagu xareeyey. Xeryahan dadkii lagu xareeyey dhammaantiis, amaba badankoodii 'waa la qaaday'. Waxaa loo qaaday Yurub iyo Marykanka; waxay heleen 'risboonsar'. Waa erayadii ay dadkaasi qaxootiga ahi isugu 'bishaarayn' jireen; isboonsar baan helay! Hebel waa la qaadayaa! Dhabtu se

waxay tahay in bulshadaas Soomaaliyeed la xaday oo aysan soo 'addanayn'. Waatii maahmaahdu ahayd 'dad galbeedsaday iyo rubad go'day midana sooma laabto'! Qorshaha lagu xadayaa waa uu degganaa intii aan 'xeradooda', dalkoodii hooyaan uga socdaa, la gubin baa la oran karaa; waaba la caddayn karaa haddii loo baahdo; waa bidhaan muuqata ninkii u dan leh; waa raad qoyan.

Adduunka kama dhicin, ugu yaraan waayadatan soke ee aadanuhu xog-wadaagga ahaa, dad intaas tiro la eg oo bilo gudohood la 'xantoobsaday', inta diyaarado guradadood weyntahay loo keensaday, iyagoo gacalo dheeraada u haya! Waxaa xaalkoodu ahaa xaalkii uu gabayaagu lahaa 'iyaguna markaasay ku didi, diidi mahayaane!' Markii waayeelkeedii la daaduunshey baa maxastii la daldashay.

Waxaa jirey kuwo ilaa maantadan ku jira xeryo qaxooti sida Xagar-dheer iyo Dhadhaab. Labadan dambe weli waa ay dhisan yihiin oo waxaa ayeeyo iyo awoowe ku noqday da'yartii ku hanaqaadday, iyadoo hadba da'dii soo kacda la dareersado, xaalkooduna uu yahay sidii gabayaagu yiri, "da'roontii kacdaba waydinkii gooyey reer dalale!"

Qoraalkan gaabani wuxuu wax yar ifinayaa bal waxa ku dhacay da'yartii uu waayeelkeedu dal shisheeye oo aysan diin iyo duud midna la wadaagin ula cararay, iyadoo dool ah oo dayeysan.

## GOORMAAN LA DERISNEY GAALKA

Sida taariikhda dhow ee Soomaaliya ku cad, Ingiriisku wuxuu ka mid uun yahay dawladihii Yurub ee ku soo qamaamay guud ahaan Afrika, gaar ahaana Bariga Afrika oo Soomaaliya ay ka mid tahay abbaarihii 1884, iyagoo inuu gumeysto iyo inuu gumeeyo u socda. Waxay joogeen muddo le'eg toddobaatan iyo lix sano. Muddadaas ay joogeen badankeeda waxa ku socdey dagaal gobannimo-u-dirir ah oo uu ugu weynaa kii Daraawiishtu. Sidaas darteed uma suura gelin Ingiriiska inuu saamayn dhaqan iyo mid af oo weyn ku yeesho dadka Soomaaliyeed. Inkastoo uu dhawr dugsi ka furay dalka, gaar ahaan waqooyiga, haddana xilli dambe buu ahaa furitaankoodo, 1958-dii, ardaduna waa ay yarayd. Waxaase jirey mid isagu wa-xoogaa ka sii horreeyey kuwan dambe oo Berbera, fadhigii gumeystaha, laga furay abbaarihii 1938-dii. Waxaa guud ahaan dugsiyadatan loo furay carruurta xubnihii gumeystaha gacan-saarka la lahaa, iyo oday-dhaqameedyadii ka agdhawaa ee mishaaraka ka qaadanayey, intooda badana uu gumeystuhu ka dhinac sameeyey hoggaankii dhaqanka ee qummanaa, si uu u wiiqo hoggaanka dhabta ah ee bulshada. War mindhaa waa hawl uu weli wado! Sidoo kale, in dugsiyadaasi yeeshaan xer badan waxaa diiday kacdoonkii bulshada Soomaaliyeed, oo xilligaas dareenkeeda diimeed aad u xoogganaa, una arkaysay in dugsigu aanu ahayn kii saxda ahaa, isla markaana uu reebayo utun aan laga biskoon.

Inkastoo waddamo badan oo ka mid ahaa kuwii la gumeystay — kuwaas oo aad u badnaa— ay af-aqooneed (language of instruction) ka dhigteen afafkii gumeysiga kaddib markii ay xornimada qaateen, sida Ingiriisiga oo ay qaateen waddamo ay ka mid yihiin Kiinya iyo Nayjeeriya, ama Faransiiska oo ay qaateen Jabuuti iyo Gaana tusaale ahaan, Soomaalidu ma aysan qaadan hal af oo keliya oo shisheeye ah sida Ingiriisiga. Waxaa jiray deegaanno ay afafkaasi qalaad ka ahaayeen afafka maamulka sagaalkii sano ee ka horreysay dowladdii milateriga. Tusaale ahaan, xarumaha maamulka ee Mogadishu waxay ku shaqayn jireen af Talyaani, halka Hargeisa ay ku shaqayn jirtay af Ingiriisi.

Diidmadaas ay muujiyeen shacabka Soomaaliyeed ayaa sababtay in gumaystuhu uusan si qoto dheer ugu dhex milmin maskaxda qofka Soomaaliga ah, uguna tallaalin caqiidadiisa ama jacayl uu u qaado dhaqankiisa. Sidaas darteed, waxaa adkaatay in bulshada Soomaaliyeed ka leexato diinteeda iyo dhaqankeeda, marka laga yimaado iska caabbintii hubaysnayd ee aan hore u soo sheegnay.

Arrintani waxay aad uga duwan tahay xaaladda dalal badan oo ku yaalla Afrika iyo Aasiya, kuwaas oo lagu qulaamiyey afafkii gumaystaha, kaddibna dadkoodu ay afafkaas u qaateen afka maamulka dowladda iyo kan waxbarashada. Dalalkaas waxaa ka mid ah kuwo afkooda hooyo ka dhigtay afka waxbarashada aasaasiga ah, sida Itoobiya, iyo kuwo si weyn waxbarashadooda ugu saleeyey afkii gumaystaha, sida Hindiya. Waxa kale oo jira dalal lagu guulaystay in si weyn looga fogeeyo afkoodii iyo dhaqankoodii asalka ahaa, sida Angola iyo Mozambique, kuwaas oo si tartiib ah ula qabsaday afkii iyo dhaqankii gumaystaha. Dalalkan waxaa u badnaa kuwii ay gumaysan jireen Faransiiska iyo Burtuqiisku, kuwaas oo lahaa hannaan gumaysi oo ka duwan kii Ingiriiska. Marka bulsho laga fogeeyo dhaqankeeda, afkeeda iyo dhaxalkeedii taariikheed, waxaa fududaata in lagu tallaalo dhaqan iyo aragti cusub, maadaama la daciifiyey xiriirkii ay la lahayd hiddeheeda iyo aqoonsigeeda. Sidaas darteed, bulsho leh dhaqan, diin iyo ilbaxnimo qoto dheer oo ku xididaysan nolosheeda maalinlaha ah ayaa ka adag in si buuxda loo daaduunsho ama loo qaabeeyo sida uu rabo gumaystuhu.

# DHAAWAC CUSUB IYO DHIRAAN LA AQOON

Mar haddaynu isla aragnay wixii Soomaalida iyo reer Yurub hore u dhex maray, bal haatanna aynu wax ka niraahno waxa Soomaalidii Yurub iyo Maraykan ku qulqushay, iyo saamaynta ay ku yeelatay, gaar ahaan da'yarta. Bulshada Soomaaliyeed waxaa dhakhtar uga ahaa qof loo yaqaan dhir-yaqaan, nin ama naagba ha ahaadee. Dhir-yaqaankani, marka laga soo tago xirfadda uu u lahaa kabka lafaha jaban iyo lafa-gurka, wuxuu ahaa qof si qoto dheer u yaqaannay noocyada dhirta ka baxda deegaanka iyo waxtarka ay u leeyihiin daaweynta dhaawacyada iyo cudurrada bulshada dhexdeeda ka jira. Sidoo kale, wuxuu aqoon durugsan u lahaa xoolaha la dhaqdo iyo sida looga faa'iidaysan karo daaweynta, dhaymada dhaawacyada, baanista, ama kabka wixii jab ah ee yimaada. Marka laga soo tago aqoonta dhirta iyo xoolaha, dhir-yaqaanku wuxuu kaloo si fiican u garan jiray nooca dhaawaca, waxa sababay, ha ahaato hub ama duurjoog, iyo habka ugu habboon ee loo daweyn karo. Isku darka labadaas aqoonood — aqoonta dhirta iyo xoolaha dhinac, iyo fahamka dhaawaca iyo sababihiisa dhinaca kale — ayaa u suuragelin jiray inuu si guul leh wax uga qabto waxyeellada iyo dhaawacyada soo gaara bulshada.

Aan kaftan isaga darsannee, Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa: "Naagtii meel aysan ka uunsan jirin ka uunsata, meel aysan ka guban jirinna way ka gubataa." Macnaha maahmaahdani waa in qofka aan aqoon iyo garasho ku dhaqmin ay u badan tahay in halkii uu waxtar ka heli lahaa uu waxyeello ka dhaxlo. Haddaba, hadalkan waxaan uga dan leeyahay in hooyada iyo aabbaha Soomaaliyeed, markii ay dalkoodii joogeen, ay lahaayeen hannaan iyo hab ay carruurtooda ugu barbaariyaan akhlaaqda, dhaqanka iyo diinta. Waxaa jiray waddooyin iyo habab gaar ah oo lagu laylin jiray dhallinyarada, ha noqoto dhinaca dhaqanka ama dhinaca diinta. Sidoo kale, ma jirin dhaqan ama diin qalaad oo si weyn ugu furan bulshada, taas oo laga cabsi qabay inay da'yarta aan weli korriinka buuxa gaarin ku dhex milmaan, dabadeedna ka leexdaan dhaqankoodii iyo diintoodii. Waxaa intaas dheer in Soomaalidu ay ahayd bulsho isku af, isku diin iyo isku dhaqan ah, oo aan ku kala duwannayn isir iyo caqiido. Arrintan, inkastoo ay lahayd faa'iidooyin badan, haddana waxay lahayd dhinac nugleyn ah. Qofka ka baxa bulshadaas oo gala deegaan shisheeye ma ahayn qof si buuxda loogu tababaray inuu iska difaaco saamaynta dhaqan iyo diin kale, ama si qoto dheer u fahmo caqabadaha ka dhalan kara. Waxa kale oo dhici karta inuusan si buuxda ugu baraarugsanayn qiimaha diintiisa iyo hidihiisa, maadaama uusan si toos ah u soo marin xaalad uu ku dareemo waxa laga dhaxlo dhaqan iyo diin la'aan, ama uusan garwaaqsanayn dadaalkii dheer ee loo soo maray ilaalinta iyo gudbinta dhaxalkaas bulsheed ee aan la kala iibsan karin.

Soomaalidu waxay Yurub iyo Maraykan imanaysey muddo ka badan boqol sano. Dadkii ugu horreeyey waxay ahaayeen rag badmaaxyo ah oo inta badan dhaqan ahaan reer miyi ahaa. Waxay ka shaqayn jireen maraakiibta waaweyn ee reer Yurub, kuwaas oo isaga gooshi jiray qaaradaha adduunka. Inta badan shaqadoodu waxay ku koobnayd hawlaha markabka dhexdiisa iyo dekedaha ay maraakiibtu ku xiran jireen. Raggaas, oo tiradooda lagu qiyaaso wax ka yar kun qof, intooda badani waxay ku milmeen bulshooyinkii reer Yurub ee ay tageen. Waxaa jiray qaar dib ugu soo laabtay dalkooda, balse ma aysan badnayn. Sababaha ugu waaweyn ee keenay milankooda iyo in ay lumiyaan qaybo ka mid ah diintoodii iyo dhaqankoodii waxaa ka mid ahaa in aysan wadan haween Soomaaliyeed, isla markaana ay u badnaayeen dhallinyaro xoogsato ah oo aan lahayn xirfado kale marka laga reebo aqoon kooban oo af Ingiriisi ah. Arrintaasi waxay sababtay in qaar badan ay ku milmaan noloshii iyo dhaqamadii ay la kulmeen, ayna la qabsadaan hab-nololeedkii bulshooyinka ay dhex galeen. Qof qof ayaa ka badbaaday isbeddelladaas, hase yeeshee intooda badan waxay ku dhex milmeen bulshooyinkii ay tageen, ama markii dambe waxay qoys ka samaysteen dalalkaas, gaar ahaan ka dib qulqulkii Soomaalida ee kordhay wixii ka dambeeyey siddeetamaadkii.

Soomaalidu uguma horrayn dad islaam ah oo inta dalkoodii ka yimaada Yurub rugeysta oo dega. Dad badan oo muslimka Aasiya ah baa uga horreeyey, tira ahaanna aad uga badnaa Soomaalidii badmaaxa ahayd.

Soomaalidu uguma horrayn dad Islaam ah oo dalkoodii ka yimaada kuna nagaada Yurub. Waxaa ka horreeyey bulshooyin badan oo Muslimiin Aasiya ka yimid, kuwaas oo Yurub degay xilliyo hore, tiradooduna aad uga badnayd tii Soomaalidii badmaaxiinta ahayd.

# SOOMAALIYA IYO JAMHUURIYADDA SADDEXAAD:

## BURBUR MISE BISLAANSHO SIYAASADEED?



Cabdullaahi Cabdi
(Cabdullaahi Dheere)



Xigashada Sawirka: AI

# DOWLADNIMADA IYO DABEECADDA KHILAAFKA

Doodaha ku saabsan burburka ama jiritaanka dowladnimada Soomaaliya waxay inta badan ka dhashaan muranno siyaasadeed sida doorashooyinka, hannaanka awoodda lagula kala wareegaayo, iyo heshiisyada aan dhammaystirnayn. Dad badan waxay u arkaan in khilaaf kasta oo siyaasadeed uu calaamad u yahay burbur dowladeed, halka kuwa kale ay ku doodaan in dowladnimadu aysan ku dhammaan khilaaf, balse ay ku bislaato dhexdiisa.

Taariikh ahaan, dowlad-dhisku (state-building) marna ma ahayn hannaan nadiif ah, toosan, ama si buuxda ugu dhisan nabad iyo is-afgarad. Inta badan dowladaha casriga ah waxay kasoo unkameen geeddi-socodyo adag oo ay ku jireen dagaallo, gorgortan siyaasadeed, cadaadisyo kala duwan, tijaabooyin hay'adeed, iyo la-qabsasho bulsho.

Dowlad-dhis ma aha dhacdo hal mar lagu guuleysto, balse waa geeddi-socod dheer oo soo mara marxalado kala duwan. Geeddi-socodkaas waxaa ka mid ah muranno siyaasadeed, dib-u-dhacyo, isqabqabsi iyo loollan awoodeed, iyo dadaallo joogto ah oo lagu gaarayo dib-u-heshiisiin iyo is-afgarad.

Sidaas darteed, ismariwaaga siyaasadeed ee Soomaaliya maanta ka jira looma fasiran karo inuu yahay burburkii "Jamhuuriyaddii Saddexaad", balse wuxuu qayb ka yahay marxaladaha kala-guurka iyo korriinka siyaasadeed ee bulshada Soomaaliyeed ay marayso. Bulsho kasta oo isku dayaysa inay dib u dhisto hay'ado, heshiis qaran, iyo nidaam awood-qaybsi waxay si dabiici ah u martaa marxalado ay ka mid yihiin: kalsooni darro, muran sharci, tartan awood, iyo is-afgaranwaa ku saabsan jihada dowladnimo.

Khilaafyadaasi waxay noqon karaan kuwo halis ah, balse taariikhdu waxay muujinaysaa in aysan khasab ahaan ka dhignayn geerida jamhuuriyadda. Marar badan waxay yihiin calaamado muujinaya in bulshada iyo hormoodkeeda siyaasadeed ay wali ku jiraan geeddi-socodka qeexidda shaxda xeerarka ciyaarta siyaasadeed.

Waxaa intaas dheer in codadka ku baaqaya in "Jamhuuriyaddii 3aad fashilantay" ay mararka qaar galayaan gaf taariikheed oo weyn, sababtoo ah cimriga ummadaha laguma cabbiro cimriga ashkhaasta, xukuumadaha, ama hal, laba, ama saddex jiil. Ummaduhu waa mashruucyo taariikhi ah oo socda qarniyo badan, halka hoggaamiyeyaasha iyo nidaamyada siyaasadeed ay yihiin marxalado isbeddelaya oo ku-meel-gaar ah.

Sidaa darteed, qalalaase siyaasadeed oo dhowr sano socday laguma go'aamin karo jiritaanka ama dhimashada jamhuuriyad dhan. Taariikhda ummadaha waxaa lagu cabbiraa awoodda ay uga gudbaan dhibaatooyinka iyaga oo ilaalinaya jiritaanka guud ee bulshada iyo dowladnimada.

# DAGAALKA IYO DHISMAHA DOWLADAHA

Cilmibaare siyaasadeed Charles Tilly, maqaalkiisii caanka ahaa "War Making and State Making as Organized Crime", wuxuu soo bandhigay aragti saameyn weyn ku yeelatay fahamka dowlad-dhiska casriga ah. Tilly wuxuu ku dooday in samaysanka dowladaha casriga ahi uu si dhow ula xirnaa dagaallada iyo dadaallada lagu ururinayay awoodda siyaasadeed. Wuxuu aragtidiisa ku soo koobay weedha caanka noqotay: "War made the state, and the state made war."

Tilly wuxuu ku dooday in dowladaha Yurub aysan ka dhalan heshiisyo qumman ama nidaamyo dimuqraadi ah oo markiiba hirgalay, balse ay kasoo unkameen tartan adag oo ku salaysnaa raadinta awoodda, sugidda amniga, ururinta canshuuraha, iyo xakamaynta bulshada.

Markii boqorrada iyo hoggaamiyeyaashu ay wajahaan dagaallo dibadeed, kacdoonno gudaha ah, iyo khataro amni, waxay ku qasbanaadeen inay dhisaan nidaam canshuureed oo joogto ah, ciidan rasmi ah, maamul dhuleed wax ku ool ah, kaabayaal dowladeed, iyo hay'ado maamul (bureaucracy) oo awood leh si ay u sugaan amniga una xoojiyaan awoodda dowladda.

Si loo maalgeliyo dagaallada loona ilaaliyo xukunka, dowladuhu waxay si tartiib tartiib ah u abuureen hay'ado casri ah. Tilly wuxuu xitaa isbarbardhig ku sameeyay dowladihii hore iyo dambiyada abaabulan ee maafiyada "organized crime", isagoo sheegay in mararka qaar dowladuhu dadka ka qaadaan canshuur iyo baad iyagoo ku doodaya inay ka ilaalinayaan khataro — halka qaar ka mid ah khatarahaas ay iyagu qayb ka yihiin ama ay ka faa'iideystaan.

Hase yeeshee, waxaa muhiim ah in si sax ah loo fahmo aragtida Tilly. Ujeeddadiisu ma ahayn inuu ku talinayo in bulshooyinka maanta ay maraan waddadii rabshadaha iyo dagaallada ee ay soo mareen

dowladihii Yurub si ay u dhisaan dowladnimo. Aragtidiisu waxay ahayd mid taariikhi ah oo sharraxaysa sida dowladaha maanta jira ay dhab ahaan kusoo samaysmeen qarniyadii hore.

Sidaas darteed, aragtidiisu ma ahayn in dhib iyo dagaal la maro si dowlad loo dhiso, ee waxay ahayd in dowladaha maanta jira taariikh ahaan sidan ayay kusoo koreen.

Farqigaas ayaa muhiim ah. Xilligan casriga ah, dowlad-dhis guuleysta wuxuu inta badan ku salaysan yahay heshiis siyaasadeed, sharciyad la aqbalo, hay'ado loo dhan yahay, iyo maamul hufan oo wax ku dhisan. Sidaas awgeed, dowladuhu maanta waxay u badan yihiin inay ku dhismaan is-afgarad iyo ka-qaybgal siyaasadeed, halkii ay ku dhismi lahaayeen dagaal, qasab, iyo adeegsiga xoogga.

Si kastaba ha ahaatee, casharka laga qaadan karo Tilly waa inaan sawir qurxin xad-dhaaf leh (romanticization) laga bixin dowladaha maanta deggan, sidii iyagoo mar walba ahaan jiray nidaamyo qumman oo xasilloon. Inta badan waxay soo mareen marxalado adag oo khilaaf iyo qalalaase leh ka hor inta aysan gaarin heerka ay maanta joogaan.

## CASHARRADA TAARIIKHDA

Dalal badan oo maanta loo arko kuwo xasilloon ayaa soo maray xaalado ka adag kuwa Soomaaliya maanta wajahayso. Kenya waxay wajahday rabshado qowmiyadeed doorashadii 2007-dii; Lubnaan muddo dheer ayay madaxweyne la'aan ahayd; Talyaaniguna wuxuu caan ku noqday dowlado si joogto ah u dhacaya. Si kastaba ha ahaatee, dalalkaas jamhuuriyadahoodu ma aysan dhiman, sababtoo ah hay'adihii dowliga ahaa iyo heshiiskii guud ee wada noolaanshaha ayaa sii jiray.

Casharka ugu weyn ee taariikhdu bixiso waa in dowladuhu aysan ku xoogeysan maqnaanshaha khilaafka, balse ay ku xoogeystaan awoodda ay uga gudbaan khilaafka iyaga oo aan burburin nidaamka guud. Ummadaha waaweyn ma badbaadaan sababtoo ah ma laha dhibaatooyin siyaasadeed; waxay badbaadaan sababtoo ah waxay yeeshaan awood ay ugu dulqaataan qalalaasaha iyaga oo aan jebin xenydaabkii dowladnimada.

## HAY'ADAHA IYO DULQAADKA SIYAASADEED

Dowladnimo waarta waxay ku tiirsan tahay waxa lagu magacaabo "institutional patience" — dulqaadka hay'adaha. Tani waxay tilmaamaysaa in bulshooyinka iyo kooxaha siyaasadeed ay aqbalaan in:

- Guuldarro siyaasadeed aysan ka dhignayn burbur nidaam.
- Isbeddelka lagu raadiyo gudaha nidaamka, aan la burburin nidaamka laftiisa.
- Iyo in dowladnimadu ka weyn tahay danaha ku-meel-gaarka ah ee koox ama hoggaan gaar ah.

Culumo badan oo ka faallooda siyaasadda iyo dowlad-dhiska, sida Samuel Huntington iyo Francis Fukuyama, waxay tilmaameen in hay'adaha dowladeed aysan hal mar ku bislaan, balse ay ku kobcaan hab tartiib tartiib ah. Sidaa darteed, dowladaha cusub ama kuwa kasoo kabanaya burburka waxay si gaar ah ugu baahanyihiin waqti ku filan, dulqaad siyaasadeed, iyo heshiisyo siyaasadeed oo soo noqnoqda si loo dhiso hay'ado adag oo waara.

Marka kooxaha siyaasadeed ay lumiyaan kalsoonida hay'adaha, waxay u nuglaadaan inay nidaamka dhan fashiliyaan halkii ay ku sixi lahaayeen hab siyaasadeed. Halkaas ayay ka dhalataa khatarta ugu weyn ee dowladaha jilicsan: in khilaafka siyaasadeed loo beddelo su'aal ku saabsan jiritaanka qaranka laftiisa.

## SOOMAALIYA IYO CIMRIGA DOWLADNIMADA

Soomaaliya maanta waxay ku jirtaa marxalad adag oo kala-guur siyaasadeed ah, hase yeeshee taasi macnaheedu ma aha in dowladnimadu gebi ahaanba fashilantay. Taariikh ahaan, jamhuuriyaduhu inta badan hal mar ma burburaan; waxay maraan marxalado ay ka mid yihiin daciifnimo hay'adeed, muranno sharci iyo siyaasadeed, iyo dib-u-habayn joogto ah, ka hor inta aysan dib ugu soo laaban xasillooni iyo isku dheelitirnaan siyaasadeed.

Waxa muhiimka ahi ma aha in khilaaf siyaasadeed jiro ama uusan jirin, balse waa in hay'adaha dowladeed ay sii shaqeeyaan, in waddooyinka wada hadalka iyo is-afgaradku furnaadaan, iyo in bulshada ay sii rumaysnaato in isbeddelka lagu gaari karo hababka iyo hay'adaha sharciga ah ee nidaamka gudihiisa.

## GUNAANAD

Dowladnimadu ma aha heer hal mar la gaaro, balse waa geeddi-socod dheer oo ku dhisan dhismaha hay'adaha, kobcinta kalsoonida bulshada, iyo adkaysiga qaran. Ummadaha waaweyn kuma sii jiraan jiritaankooda sababtoo ah khilaaf kama dhex dhaco, balse waxay ku sii waaraan awooddooda ay ku maareeyaan khilaafaadkaas iyaga oo adeegsanaya hay'ado sharci ah iyo hannaan siyaasadeed oo shaqaynaya. Sidaas darteed, samirka siyaasadeed, dulqaadka hay'adeed, iyo kartida looga gudbo xilliyada qalalaasaha iyada oo aan laga tanaasulin dowladnimada ayaa ka mid ah tiirarka ugu muhiimsan ee lagu ilaaliyo xasilloonida iyo jiritaanka qaran.

Sidaas darteed, ismariwaaga siyaasadeed ee Soomaaliya maanta ka jira looma fasiran karo inuu yahay dhammaadka Jamhuuriyadda Saddexaad, balse waa qayb ka mid ah geeddi-socodka dheer ee dowlad-dhisidda iyo bislaanshaha siyaasadeed. Waa marxalad ay bulshada Soomaaliyeed ku baranayso xeerarka tartanka siyaasadeed, hababka maareynta khilaafaadka, iyo dhismaha hay'ado waara oo ka sarreeya danaha gaarka ah iyo kuwa ku-meel-gaarka ah. Guusha geeddi-socodkan kuma xirna maqnaanshaha khilaaf, balse waxay ku xiran tahay awoodda lagu xallin karo khilaafaadkaas iyada oo la ilaalinayo hay'adaha, sharciga, iyo midnimada siyaasadeed ee dalka.

**W/Q:** Cabdullaahi Cabdi (Cabdullaahi Dheere)



# DHAN MISE DHIMMAN?

## SIYAASADDA WAXBARASHADA PUNTLAND (QAYBTA 1-AAD)



Bashiir Suuley

Xigashada Sawirka: Wasaaradda Waxbarshada Puntland



Haddii aad tahay injineer doonaya in uu ku fara-yaraysto guri casri ah oo qurux badan, xaggee baad marka koowaad shaqada ka bilaabi lahayd? Ma dhismaha daydka guriga? Ma kan qolalka? Ma dhiraynta? Mise shububka?

Xaqiiqadu waxay tahay in injineer kastaa ay tahay in uu marka hore diyaariyo naqshadda (design-ka) guriga. Naqshaddu waa tan qeexda sida gurigu u ekaan doono marka la dhammeeyo, inta qol ee uu yeelan doono, halka uu albaabkiisu ahaan doono, tayada guriga laga filayo in uu yeesho iyo wixii la mid ah. Intaas ka dib ayaa injineerku ka fakarayaa dhammaan agabka uu u baahanyahay si uu dhiso guriga uu sawirkiisa haysto. Gurigaasu in uu noqdo mid waayo jira iyo in uu noqdo mid aan waarin, waxa ay ka bilaaban doontaa qaabka loo naqshadeeyo oo lagu daray agabka galaya iyo xirfadda fuundiyaasha dhisi doona.

Sidaas oo kale, siyaasadda waxbarashadu waa naqshadda bulshada iyo jiilka mustaqbalka. Waa qorshaha lagu sawirayo nooca kaadirka la doonayo inuu ka soo baxo dugsiyada iyo jaamacadaha dalka. Marka uu kuu sawiranyahay nooca ardayga ee aad doonaysid in uu kuu soo baxo ka dib ayaad ka fakari kartaa wax kasta oo aad u baahantahay si aad mustaqbalka aad u heshid ardayga kuu sawiran oo sax ah. Si kooban, siyaasadda waxbarashadu waa halka laga suureeyo mustaqbalka jiilka soo baxaya iyo si guud sida uu deegaankaasu u ekaan doono.

Siyaasadda waxbarashadu waa xeerar, mabaadi', himilooyin iyo qorsheyaal hagaya nidaamka waxbarashada ee dal ama maamul. Waxa ay qeexdaa waxa la dhigayo, cidda la barayo, sida loo barayo, cidda mas'uulka ka ah, iyo natiijada laga doonayo nidaamka waxbarashada. Siyaasaddu ma aha oo keliya dukumenti; waa jihada iyo falsafadda hagaysa waxbarashada qaranka.

## MUHIIMADDA SIYAASADDA WAXBARASHADA

Siyaasad waxbarasho la'aanteed, waxbarashadu waxa ay noqon kartaa jaantaa rogan ay iskuulladu soo saaraan qofka ay doonaan, jaamacaduhuna door bidaan sidii ay ugu badiso. Haddaba, waxaa jira muhiimmado dhowr ah oo ay siyaasaddu gaar la tahay oo ay ka mid yihiin:

- Siyaasaddu waxa ay mideysaa jihada waxbarashada.
- Waxa ay xaqiijisaa tayada iyo heerarka waxbarasho.
- Waxa ay ilaalisaa qiyamka, dhaqanka iyo aqoonsiga bulshada.
- Waxa ay soo saartaa shaqaale iyo xirfadlayaal ka turjumaya baahida rasmiga ee dalkaas.
- Waxa ay taageertaa horumarka dhaqaale iyo bulsho ee deegaanka.
- Sidoo kale waxa ay yareysaa sinnaan la'aanta waxbarashada.

## SIYAASADDA WAXBARASHADA PUNTLAND

Waxa ay igu qaadatay waqti dheer ah in aan helo siyaasadda waxbarashada Puntland. Waxa aan go'aansaday in aan ka bilaabo baaristeeda Website-ka rasmiga ah ee Wasaaradda Waxbarshada, nasiib-darro se waxa aan helay farriin sheegaysa in website-ka waasarradu uusan hawadaba ku jirin oo uusan xilligaan shaqaynayn. Waxa aan ku xijiyey in aan ka baaro maamuleyaasha dugsiyada hoose, dhexe iyo sare ba, waxa aan u gudbay jaamacado, ka dibna xafiisyo tiro beel ah oo wasaaradda ah, intaba iigama suuroobin in aan helo siyaasadda waxbarshada ee Puntland. Wareeg dheer ka dib waxa aan ka helay mid ka mid ah saraakiisha wasaaradda. Arrintani waa mid ka mid ah dhaliilaha ugu waaweyn ee shaki galin kara dhaqan-galinteeda.

Siyaasaddani waa mid ku taariikhaysan in dib u eegis lagu sameeyey Feebaraayo 2024. Waxa aan ka samayn doonnaa taxane aan ku eegayno waxa ka hirgalay iyo waxa ka dhimman, waxa aanse maqaalkaan koowaad xoogga ku saari doonaa haddii Rabbi idmo arrimaha ay xoogga saarayso iyo si guud dhaliilaha ay leedahay lafteedu inta aan hirgalinteeda la gaarin.

Siyaasadda waxbarshada Puntland si guud waxa ay tilmaamaysaa qaab-dhismeedka waxbarashada, laga bilaabo waxbarashada carruurnimada hore ilaa tacliinta sare, iyadoo sidoo kale xoogga saaraysa waxbarashada farsamada iyo xirfadaha, waxbarashada dadka baahiyaha gaarka ah qaba, waxbarashada dadban, tayeynta manhajka, tababarka macallimiinta, nidaamka imtixaanaadka, hubinta tayada waxbarashada, iyo maamulka hay'adaha waxbarashada. Sidoo kale,

waxa ay qeexaysaa himilooyinka, ujeeddooyinka, iyo istaraatiijiyadaha lagu hagayo horumarinta waxbarashada Puntland, iyadoo isku dayaysa inay abuurto nidaam waxbarasho oo loo wada siman yahay, tayo leh, isla markaana la jaanqaadi kara baahiyaha bulshada iyo isbeddellada dunida casriga ah. Haddaba, inkasta oo siyaasaddu si ballaaran u taabanayso dhinacyo badan oo muhiim u ah horumarinta waxbarashada, haddana waxaa jira dhaliilo ay tahay in la saxo.

## DHALIILAHA JIRA IYO DHAMMAYSTIRKOODA

Inkasta oo Siyaasadda Waxbarashada Puntland ee 2024 ay xambaarsan tahay himilooyin waaweyn iyo aragti ku salaysan horumarinta tayada waxbarashada, haddana marka si qoto dheer loo falanqeeyo waxaa muuqanaya dhowr arrimood oo muhiim ah oo u baahan dib-u-eegis, xoojin, iyo waafajin la jaanqaadaysa isbeddellada degdegga ah ee dunida casriga ah. Siyaasad kasta oo waxbarasho oo lagu saleeyo mustaqbal fog waa in ay awood u leedahay in ay saadaaliso caqabadaha soo socda, isla markaana ay diyaargarow u samayso jiilka la filayo in uu hoggaamiyo bulshada sannadaha dambe. Marka laga eego dhinacaas, siyaasaddan waxaa ku jira dhaliilo dhowr ah oo mudan in la dhammaystiro.

Marka koowaad, siyaasaddu ma siin mudnaanta ay mudan tahay kacaanka tiknooloojiyadda iyo isbeddelka dhijitaalka ah ee maanta dib u qaabaynaya habka waxbarashada, shaqada, iyo nolosha guud ahaan. Maanta dunidu waxa ay ku socotaa xawaare ay horseedayaan garaadka macmalka ah (Artificial Intelligence) iyo tiknooloojiyado kale oo casri ah. Carruurta maanta fadhiya kuraasta fasallada hoose waxay u badan tahay inay mustaqbalka galaan suuq shaqo oo gebi ahaanba ka duwan kan maanta jira. Sidaa darteed, siyaasad waxbarasho oo doonaysa inay diyaariso jiil tartan la geli kara caalamka waa in ay si cad u qeexdaa qorshayaal lagu kobcinayo STEM (Science, Technology, Engineering and Mathematics), coding, digital literacy, iyo xirfadaha qarniga 21-aad. Inkasta oo siyaasaddu mararka qaarkood xusayso tiknooloojiyadda, haddana kama muuqato aragti istaraatiijiyadeed oo qoto dheer oo ku saabsan sida ardayda Puntland loogu diyaarinayo dunida dhijitaalka ah ee soo socota.

Marka labaad, siyaasaddu waxay si faahfaahsan uga hadlaysaa yoolal, himilooyin, iyo istaraatiijiyado badan, balse si cad uma qeexayso ilaha dhaqaale ee lagu hirgelinayo qorshayaashaas. Taariikh ahaan, caqabadda ugu weyn ee hortaagan siyaasado badan oo Afrika laga hirgeliyo ma ahan fikradaha ku qoran waraaqaha, balse waa awoodda dhaqaale ee lagu fulin karo. Sidaas darteed, qorshe kasta oo horumarineed wuxuu u baahan yahay hannaan maaliyadeed oo qeexan, miisaaniyad lagu kalsoonaan karo, iyo istaraatiijiyad lagu xaqiijinayo joogtaynta maalgelinta. Haddii aan la helin qorshe dhaqaale oo cad, waxaa jirta khatar ah in himilooyinka quruxda badan ee siyaasaddu ay ku ekaadaan qoraal aan si dhab ah uga muuqan goobaha waxbarashada.

Marka saddexaad, inkasta oo siyaasaddu xoogga saarayso tayada waxbarashada iyo ballaarinta helitaanka adeegyada waxbarasho sida ku qoran, haddana xiriirka ka dhexeeya waxbarashada iyo suuqa shaqada wali uma muuqdo mid si qoto dheer loo dhisay. Mid ka mid ah su'aalaha ugu muhiimsan ee ay tahay in ay siyaasaddu ka jawaabto ayaa ah: xirfado noocee ah ayay Puntland u baahan doontaa tobanka ama labaatanka sano ee soo socda? Jawaabta su'aashaas ayaa saldhig u noqon lahayd qorshaynta manhajka, tababarka macallimiinta, iyo kobcinta waxbarashada farsamada iyo xirfadaha. Haddii waxbarashadu ka go'do baahiyaha dhabta ah ee dhaqaalaha iyo shaqo-abuurka, waxaa sii kordhi kara farqiga u dhexeeya aqoonta ay dugsiyadu bixiyaan iyo xirfadaha ay bulshada iyo suuqa shaqadu u baahan yihiin.

Marka afraad, siyaasaddu si kooban ayay uga hadlaysaa daryeelka ardayda, balse si ku filan ugama hadlin caafimaadka maskaxda iyo adeegyada la-talinta ee dugsiyada. Xilligan casriga ah, caafimaadka maskaxdu wuxuu noqday tiir muhiim ah oo ka mid ah nidaamyada waxbarashada ee guuleysta. Arday badan ayaa la kulma culaysyo nafsiyeed, dhibaatooyin qoys, walbahaar waxbarasho, iyo caqabado kale oo saameeya waxbarashadooda iyo horumarkooda shakhsiyadeed. Sidaas darteed, siyaasaddu waxay u baahan tahay inay si cad u qeexdo doorka la-taliyeyaasha dugsiyada, adeegyada taageerada nafsaaniga ah, iyo hababka lagu ilaalinayo caafimaadka maskaxda ee ardayda iyo macallimiinta.

Marka shanaad, waxaa muuqata in doorka cilmi-baarista iyo hal-abuurka aan la siin mudnaanta ay mudan yihiin. Qarnigan la joogo, horumarka ummadaha laguma cabbiro oo keliya inta qof ee wax barata, balse sidoo kale waxaa lagu qiimeeyaa awoodda ay u leeyihiin inay curiyaan aqoon cusub, sameeyaan cilmi-baaris wax ku ool ah, islamarkaana abuuraan xalal u gaar ah dhibaatooyinka haysta bulshada. Jaamacadaha iyo xarumaha waxbarashadu waa in ay noqdaan xarumo aqoon iyo hal-abuur laga dhaliyo, halkii ay ku ekaan lahaayeen goobo lagu gudbiyo aqoon hore loo soo saaray. Sidaas awgeed, siyaasaddu waxay u baahan tahay inay si xooggan u dhiirrigeliso dhaqanka cilmi-baarista, maalgelinta hal-abuurka, iyo dhismaha nidaam isku xira waxbarashada, cilmi-baarista, iyo horumarka bulshada.

Ugu dambayn, inkasta oo Siyaasadda Waxbarashada Puntland ay tahay tallaabo muhiim ah oo lagu hagayo horumarinta waxbarashada, haddana waxaa muuqata baahi loo qabo in la sii xoojiyo dhinacyada la xiriira tiknooloojiyadda casriga ah, maalgelinta waarta, isku-xirnaanta waxbarashada iyo shaqada, caafimaadka maskaxda, iyo kobcinta cilmi-baarista iyo hal-abuurka. Xoojinta arrimahan waxay siyaasadda ka dhigi kartaa mid si dhab ah uga jawaabta baahiyaha maanta jira isla markaana diyaarisa jiil awood u leh inuu wajahayo caqabadaha iyo fursadaha mustaqbalka.

**W/Q:** Bashiir Suuley



# QAADKA IYO SAAMAYNTIISA BULSHADA:
## DHIBAATADA TAAGAN IYO BAAHIDA WACYIGELINEED (QAYBTA 3-AAD)



Dr. Cabdinaasir Jaamac Warsame Islaam



Xigashada Sawirka: Reuters

# HORDHAC

Qormadan waa qaybtii saddexaad ee taxanaha "Qaadka iyo Saamayntiisa Bulshada: Dhibaato Taagan iyo Baahida Wacyigelineed" ee lagu daabacayo Majaladda Marag. Labadii qaybood ee hore, oo lagu soo daabacay cadadyada 13-aad iyo 14-aad, waxa lagu falanqeeyey taariikhda qaadka iyo dhibaatooyinka caafimaad ee uu bulshada ku hayo. Qaybtan saddexaadse waxay diiradda saaraysaa saamaynta dhaqaale ee qaadku ku leeyahay qofka, qoyska iyo bulshada, iyadoo la eegayo aragtida dhaqaalaha guud iyo gaar ahaan nidaamka dhaqaalaha Islaamka.

## 1. ARAR

Farqi weyn baa u dhexeeya cilmiga dhaqaalaha iyo nidaamka dhaqaalaha. Taasina waxay ku caddahay qeexidda mid kasta iyo waxa uu xoogga saaro. Aragtida Islaamka ee dhaqaalaha iyo tan ummadaha aan Ashahaadan way kala duwan yihiin, arrintaasna waxaa si fudud u dareemi kara qof kasta oo si dhab ah u daraaseeya Diinta Islaamka.

Islaamku wuxuu hantida u qaybiyaa si caddaalad ku dhisan, wuxuuna dejiyey xeerar iyo tilmaamo hagaya sida loo kasbado maalka iyo sida loo bixiyo. Sidaa darteed, waa arrin la yaab leh in mararka qaarkood la maqlo dad sheeganaya Islaam oo leh: "Maxaa Islaam ka galay dhaqaalaha?" Hadalka noocaas ahi wuxuu muujinayaa faham la'aan ku saabsan dhammaystirnaanta shareecada Islaamka iyo sida ay u taabatay dhammaan dhinacyada nolosha aadamaha.

Islaamku wuxuu dhidibbada u aasay mabaadi'da dhaqaalaha iyo noocyada hantida bannaan ee laga ganacsan karo, sida ku cad Qur'aanka Kariimka ah iyo Sunnada Nabiga (NNKH). Waxaana adag in la helo nidaam kale oo la tartami kara hannaankaas caddaaladda ku dhisan.

Shiikh Muxammad Al-Amiin Ash-Shinqiidi, isaga oo ka hadlayey mas'alada dhaqaalaha, wuxuu sheegay in Qur'aanku caddeeyey usuusha guud ee laga qiyaas qaadanayo dhammaan laamaha dhaqaalaha. Wuxuuna tilmaamay in masaa'ilka dhaqaaluhu ku soo ururayaan laba arrimood oo waaweyn: sida hantida loo kasbado iyo sida loo isticmaalo ama loo bixiyo.

Aayado badan oo Qur'aanka ku jira ayaa tilmaamaya muhiimadda shaqada, ganacsiga iyo raadinta arsaaqadda xalaasha ah, sida aayadaha ku jira suuradaha Al-Jumcah, Al-Muzzammil, Al-Baqarah iyo An-Nisaa. Sidoo kale Qur'aanku wuxuu dadka farayaa in ay ka fogaadaan israafka (xad-dhaaf) iyo bakhaylnimada, isla markaana dhexdhexaad ka noqdaan kharashaadkooda.

## 2. WAA MAXAY DHAQAALE?

Jawaabta su'aashan waxa lagu fahmi karaa laba dhinac. Dhinaca koowaad waa cilmiga dhaqaalaha laftiisa iyo sida ay aqoonyahannadu u qeexeen. Dhinaca labaadna waa nidaamka dhaqaalaha Islaamka iyo mabaadi'diisa gaarka ah.

## 3. CILMIGA DHAQAALAHA

Adam Smith, oo loo aqoonsado aabbaha dhaqaalaha casriga ah, wuxuu cilmiga dhaqaalaha ku qeexay cilmi daraaseeya siyaabaha ay ummaduhu ku gaadhi karaan hodantinimo. Smith oo u dhashay Scotland wuxuu qoray buugaag caan ah sida The Theory of Moral Sentiments iyo The Wealth of Nations, kuwaas oo ilaa maanta loo tixgeliyo aasaaska fikirka dhaqaalaha reer galbeedka.

Aqoonyahanno kale ayaa iyaguna cilmiga dhaqaalaha ku qeexay barashada hantida, hababka lagu horumarin karo bulshada, iyo daraasadda lacagta, raasumaalka, dulsaarka iyo maalka guud ahaan. Qeexitaannadaas marka la eego, waxaa muuqata in dhaqaalaha reer galbeedku inta badan ku salaysan yahay aragti adduunyo oo aan si weyn ugu xirnayn qiyamka diimeed.

Arrintaasi waxay salka ku haysaa mabda'a kala saaraya diinta iyo nolosha, ama diinta iyo siyaasadda. Halka Islaamku uu nolosha u arko wax isku dhafan oo aan la kala saari karin, aragtidaas waxay u muuqataa mid meesha ka saaraysa hagidda Ilaahay ee arrimaha maamulka iyo dhaqaalaha.

Muslimka baranaya cilmiga dhaqaalaha waxaa waajib ku ah inuu arrintan ka feejignaado, si aanu ugu dhicin dhaqan ama nidaam ka hor imanaya shareecada Islaamka. Taariikhda casriga ahna waxay muujisay in nidaamyo badan oo ku tiirsanaa dulsaarka ay la kulmeen dhibaatooyin dhaqaale oo waaweyn.

In kasta oo dhaqaalaha reer galbeedku yahay cilmi si rasmi ah loo habeeyey qarnigii siddeed iyo tobnaad, haddana mabaadi'da dhaqaalaha Islaamku waxay soo jireen in ka badan afar iyo toban qarni. Islaamku wuxuu si cad u qeexay mabaadi'da la

xiriirta ganacsiga, wax-soo-saarka, lahaanshaha hantida, zakada, shirkadaha iyo qaybinta maalka, isaga oo dadka u daayey hababka farsamo ee wax-soo-saarka, balse hagay habka caddaaladda ku dhisan ee hantida loo qaybinayo.

## 4. NIDAAMKA DHAQAALAHA ISLAAMKA (ISLAMIC ECONOMY SYSTEM)

Dr. Muxammad Al-Khaalidi wuxuu nidaamka dhaqaalaha Islaamka ku tilmaamay nidaam sharciyeed oo hagaya lahaanshaha hantida, daboolidda baahiyaha dadka, daaweynta dhibaatooyinka dhaqaale iyo habka ugu habboon ee hantida loogu qaybiyo bulshada.

Marka la soo koobo, nidaamka dhaqaalaha Islaamku waa nidaam ku dhisan caddaalad, mas'uuliyad iyo ilaalinta danaha bulshada. Sidaas darteed, marka laga hadlayo wax kasta oo waxyeello u geysanaya hantida iyo dhaqaalaha bulshada, waxaa lama huraan noqota in si gaar ah loo eego saamaynta uu qaadku ku leeyahay dhaqaalaha qofka iyo kan bulshada.

## 5. DHIBAATOOYINKA DHAQAALE EE QAADKA

Baabba'a dhaqaale ee uu keeno qaadku waa wax aan ka qarsooneyn bulshada Soomaaliyeed. Inkasta oo marar badan laga hadlo dhibaatooyinka caafimaad iyo kuwa bulsho ee uu leeyahay, haddana dhaawaca dhaqaale ee uu ku hayo qoysaska iyo dhaqaalaha qaranka ayaa ah mid aad u ballaaran. Dadka qaarkood marka ay tilmaamayaan waxyeellada dhaqaale ee qaadka waxay ku sheegaan inuu hoos u dhigo wax-soo-saarka, waxaana ka dhasha arrintaas in uu yaraado waxyaabaha dalku bannaanka u dhoofiyo iyo awoodda shaqo ee bulshada.

Qofka waqtigiisa badan ku bixiya cunista qaadka wuxuu lumiyaa saacado badan oo shaqo iyo wax-qabad ah. Saacadihii lagu bixin lahaa wax-soo-saar, ganacsi, waxbarasho ama xirfad kororsi ayaa ku dhammaada fadhi qaad. Sidaas darteed, dalalka uu qaadku ku badan yahay waxaa inta badan yaraada saacadaha wax-ku-oolka ah ee shaqada, waxaana hoos u dhac ku yimaada wax-soo-saarka guud ee bulshada.

Marka laga yimaado waqtiga lumaya, qaadku wuxuu noqday mid ka mid ah meelaha ugu waaweyn ee ay lacagtu uga baxdo Soomaaliya. Inkasta oo tiro sax ah ay adag tahay in la helo sababo la xiriira xog ururin la'aanta iyo kala duwanaanta ilaha xogta, haddana warbixino kala duwan ayaa tilmaamaya in maalin kasta Soomaaliya lagu iibiyo qaad qiimihiisu ka badan yahay hal milyan oo doollar. Taas macnaheedu waa in sanad kasta boqollaal milyan oo doollar lagu bixiyo badeecad aan wax-soo-saar toos ah ku soo kordhin dhaqaalaha dalka.

Magaalada Muqdisho ayaa ah suuqa ugu weyn ee qaadka Soomaaliya. Kumannaan qof ayaa maalin kasta ku iibsada qaad lacago aad u badan, waxaana la rumaysan yahay in qaybta ugu badan ee lacagta qaadka lagu bixiyo ay ka dhacdo caasimadda. Hargeysa ayaa iyaduna ka mid ah magaalooyinka ugu isticmaalka badan qaadka Geeska Afrika, iyadoo ganacsiga qaadku noqday dhaqdhaqaaq dhaqaale oo maalinle ah oo saameeya nolosha kumannaan qoys. Magaalooyinka Boosaaso, Garoowe, Gaalkacyo, Baydhabo, Kismaayo iyo Jigjiga ayaa iyaguna leh suuqyo waaweyn oo qaadka lagu kala iibsado, taas oo ka dhigan in dhibaatada dhaqaale ee qaadku aysan ku koobnayn hal magaalo ama hal gobol.

Dhaqaalaha ku baxa qaadka marka loo eego heer qoys wuxuu leeyahay saameyn aad u muuqata. Qoysas badan ayaa qayb weyn oo dakhligooda ka mid ah ku bixiya qaad, halka carruurtoodu u baahan yihiin cunto, waxbarasho iyo daryeel caafimaad. Mararka qaarkood waxaa dhacda in mushaharkii bishii oo dhan ama qayb weyn oo ka mid ahi ku dhammaato qaad, taas oo keenta dayac qoys, faqri iyo nolol adag. Marka la booqdo qoysaska uu qaadku ku badan yahay, waxaa inta badan muuqata dhaqaale xumo joogto noqotay, carruur dayacan, nafaqo-darro iyo khilaafyo qoys oo soo noqnoqda.

Dhaawaca qaadku kuma koobna qofka iyo qoyska oo keliya. Dhaqaalaha qaranka ayaa sidoo kale dareema culayska ka dhasha lacagaha badan ee dibadda loogu wareejiyo soo dejinta qaadka. Lacagahaas haddii lagu maalgelin lahaa beeraha, kalluumaysiga, warshadaha yaryar, waxbarashada, caafimaadka ama kaabayaasha

dhaqaalaha, waxay si muuqata uga qayb qaadan lahaayeen koboca dhaqaalaha iyo shaqo-abuurka dalka. Sidaas darteed, qaadku ma aha oo keliya dhibaato caafimaad iyo mid bulsho, balse waa caqabad dhaqaale oo si toos ah iyo si dadbanba u saamaynaysa horumarka Soomaaliya.

Waxaad si dhab ah u dareemi kartaa saamaynta dhaqaale ee qaadku leeyahay markaad booqato qoys si joogto ah loogu isticmaalo. Inta badan waxaa lagu arkaa carruur dayacan, dhaqaale xumo joogto noqotay, nafaqo-darro, deyn badan iyo nolol aan xasilloonayn. Lacagtii lagu bixin lahaa cunto tayo leh, waxbarasho ama caafimaad ayaa ku dhammaata caleen aan wax faa'iido dhaqaale oo waarta lahayn. Taasi waa sababta ay culimada dhaqaalaha iyo xeeldheerayaasha bulshada badankoodu ugu tilmaamaan qaadka inuu yahay mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee hortaagan horumarka qoyska Soomaaliyeed iyo koboca dhaqaalaha qaranka.

## TIXRAACYO


1. World Bank, Somalia Economic Updates and Macroeconomic Reports, warbixino kala duwan.
2. Food Security and Nutrition Analysis Unit (FSNAU), Livelihood and Household Expenditure Studies in Somalia.
3. WardheerNews, "The Economic Cost of Khat (Miraa) to Somalia".
4. Rift Valley Institute, Galkayo's Khat Economy: Trade, Consumption and Social Impact.
5. Ministry of Finance Somalia, Budget Policy Framework Reports.
6. Cabdi Ismaaciil Samatar, State Collapse and Economic Challenges in Somalia.
7. Maxamed Cabdi Gandi, Qaadka iyo Saamayntiisa Bulshada Soomaaliyeed.
8. Muxammad Al-Amiin Ash-Shinqiidi, Adwaa'ul Bayaan.
9. Muxammad Al-Khaalidi, An-Nidaam Al-Iqtisadi Fil Islaam.




# QARAN-JABKII SOOMAALIYA:

## SAAMAYNTIISA DHALLINYARADA IYO RAJADA MUSTAQBALKA



Cabdijabaar Maxamed Farma




Xigashada Sawirka: AI

Burburkii ku dhacay dowladdii dhexe ee Soomaaliya sannadkii 1991-dii, ma ahayn oo kaliya dumis ku koobnaa nidaamkii siyaasadeed iyo kii maamul, balse wuxuu ahaa musiibo qaran oo gabi ahaanba dhalan-rogay mustaqbalka dhalinyaro badan oo Soomaaliyeed. Kahor masiibadan, dhallinyarada Soomaaliyeed waxay safka hore kaga jireen horumarka, aqoonta, iyo is-dhexgalka caalamka. Maanta waxay dhaxleen dal ka dambeeya horumarka dunida, taas oo ku reebtay nabar nafsiyeed oo qoto dheer iyo dareen quus ah. Si kastaba ha ahaatee, waxay muujiyeen adkaysi, hal-abuur iyo halgan joogto ah oo marag u ah kartida iyo rajada ay weli u qabaan mustaqbal wanaagsan.

## SHALAY IYO MAANTA: FURSADIHII DAHABIGA AHAA EE LUMAY

Xilligii ay jirtay dowladdii dhexe ee Soomaaliya, dhallinyaradu waxay ahaayeen matalayaasha rasmiga ah ee qaranka. Dowladda ayaa bixin jirtay deeqo waxbarasho oo caalami ah oo bilaash ah (Scholarships) oo ku dhisnaa aqoon iyo tartan hufan. Dhallinyarada Soomaaliyeed waxay fursad u heli jireen inay wax ka bartaan jaamacadaha ugu magaca weyn Talyaaniga, Mareykanka, Midowgii Sofiyeeti (Soviet Union) iyo dalal badan oo Carbeed.

Tusaale ahaan, dhallinyaradii ka qalin-jabin jirtay Jaamacaddii Ummadda Soomaaliyeed (Somali National University) waxay si fudud ugu biiri jireen suuqyada shaqada ee caalamiga ah iyagoona ka qeybqaadan jiray daraasado iyo cilmi-baarisyo heer sare ah, maadaama tayada waxbarashadu la jaanqaadaysay heerarka caalamiga ah. Sidoo kale, baasaboorka Soomaaliyeed wuxuu ka mid ahaa kuwa sumcadda iyo aqoonsiga leh, isagoo u sahli jiray muwaadiniinta inay u safraan dalal badan oo dunida ah iyagoo aan la kulmin caqabadaha iyo xannibaadaha maanta jira.

Maanta, sawirku aad buu uga duwan yahay. Burburkii kadib, dhallinyarada Soomaaliyeed waxay waayeen qayb weyn oo ka mid ah fursadihii waxbarasho, shaqo iyo is dhexgal ee ay hore ugu lahaayeen dunida. Meel kasta oo uu joogo qof dhallinyaro Soomaaliyeed ah, ha noqoto Muqdisho, Hargeysa ama Garoowe, wuxuu la tacaalaa caqabado ay ka mid yihiin xayiraadaha socdaalka, aqoonsi la'aanta ama xaddidaadda baasaboorka Soomaaliyeed, iyo nidaam waxbarasho oo inta badan aan si buuxda ula jaanqaadi karin baahiyaha casriga ah ee tiknooloojiyada, sayniska iyo hal abuurka.

## HALGANKA SHAQSIGA AH IYO DOORKII DAWLADNIMO EE MAQAN

In kasta oo ay jireen duruufo adag iyo caqabado waaweyn oo dhanka nidaamka ah, dhallinyarada Soomaaliyeed ma aysan quusan. Kumannaan dhallinyaro ah ayaa dalka gudihiisa ka hirgeliyay shirkado gaar loo leeyahay, xarumo waxbarasho iyo ururro bulsho oo door muhiim ah ka qaatay horumarinta nolosha bulshada. Waxay barteen xirfado casri ah iyagoo ka faa'iidaysanaya internetka iyo fursadaha waxbarasho ee dhijitaalka ah, waxayna muujiyeen hal abuur iyo karti la taaban karo oo ku aaddan ganacsiga casriga ah, tiknooloojiyada iyo adeegyada bulshada.

Hase yeeshee, halgankaas iyo dadaalkaas shaqsiga ah waxaa ka hor yimid caqabado waaweyn oo aysan sahlanayn in laga gudbo, kuwaas oo inta badan ka dhashay maqnaanshaha doorkii dowlad dhexe oo awood leh. Marka ay dhallinyaradu isku dayaan inay ka faa'iidaystaan fursadaha caalamiga ah, waxay la kulmaan nidaamyo iyo duruufo ka hor istaaga.

Waxay waayeen dowlad qaran oo u fududeysa abaabulka maaliyadeed iyo helitaanka maalgashi caalami ah, maadaama aysan jirin bangiyo qaran oo si buuxda ugu xiran nidaamyada maaliyadeed ee caalamiga ah, aqoonsiga shahaadooyinka ay ku kasbadeen dalka gudihiisa, kuwaas oo inta badan aan helin aqoonsi buuxa oo caalami ah sababo la xiriira tabar darrida nidaamyada tayodhowrka iyo aqoonsiga waxbarashada, iyo difaaca xuquuqdooda iyo danahooda dibadda, maadaama aysan jirin heshiisyo labo geesood ah oo ku filan oo Soomaaliya la gashay dalal kale si loogu fududeeyo dhallinyarada inay galaan suuqyada shaqada ee gobolka iyo dunida.

Waa dhallinyaro dadaal badan muujisay, balse aan haysan garabkii dowladeed ee hibadooda, aqoontooda iyo hal-abuurkooda u beddeli lahaa horumar qaran iyo guulo laga dareemo heer caalami.

## SAAMAYNTA NAFSIGA AH IYO CAQABADAHA LA JAAN-QAADKA

Marka dhallinyaradu ay waayaan fursadaha ay mudan yihiin ee dhanka shaqada, waxbarashada iyo horumarka nololeed, inkastoo ay dadaal iyo nafhur badan sameeyeen, waxaa soo baxa saameyn nafsiyeed oo qoto dheer. Aqoonyahanka reer Faransiis Frantz Fanon wuxuu ku dooday in marka bulshada laga hor istaago inay xaqiijiso himilooyinkeeda iyo mustaqbalkeeda, ay taasi dhalin karto dareen quus, niyad-jab iyo ka fogaansho bulshada. Sidaas awgeed, caqabadaha horyaalla dhallinyarada Soomaaliyeed ma aha oo keliya kuwo dhaqaale ama siyaasadeed, balse waxay sidoo kale saameyn ku yeeshaan rajada, kalsoonida iyo caafimaadka maskaxda ee jiil dhan.

Dhallinyarada Soomaaliyeed ee maanta waxay wajahayaan caqabado nafsiyeed oo isa soo taraya. Qaar badan ayaa la daalaa dhacaya walaac joogto ah (anxiety) oo ka dhasha hubanti la'aanta mustaqbalka iyo niyad-jabka ka yimaada marka dadaalkooda uusan miro dhalin. Kuwo kale waxay la kulmaan niyad-jab ba'an (depression) marka ay waayaan fursado ay ku muujiyaan hibadooda iyo aqoontooda, iyagoo arkaya dhiggooda dalalka kale oo helaya fursado horumarineed. Xaaladdan quusta iyo rajo-beelka ah ayaa sidoo kale qayb ka qaadata in qaar badan oo dhallinyaro ah ay naftooda ku biimeeyaan safarro tahriib ah oo halis badan, iyagoo u maraya badaha iyo saxaraha si ay u raadsadaan fursado ay aaminsan yihiin in laga waayay dalkooda.

Sida uu ku dooday aqoonyahanka cilmiga bulshada ee caanka ah, Zygmunt Bauman, buuggiisa Wasted Lives, bulshada ay haleelaan burburka iyo dib u dhaca horumarku waxay soo saaraan kooxo dad ah oo dareema in laga reebay fursadaha dhaqaale iyo bulsho ee ay kuwa kale helaan. Aragtidan marka lagu dabaqo Soomaaliya, waxaa muuqata in dhallinyaro badan ay la tacaalayaan dareen ah in hibadooda, aqoontooda iyo dadaalkooda aan loo helin waddo ay uga miro dhaliyaan heer qaran iyo heer caalami.

## TUSAALAYAAL CAALAMI AH: WADAMADII KA KABTAY QARAN-JABKA

Taariikhda caalamku waxay muujinaysaa in waddan kasta oo la kulma burbur iyo dib u dhac uu dib u kaban karo haddii la helo hoggaan leh aragti fog iyo qorshe qaran oo mudnaanta siiya dhallinyarada. Waayo-aragnimada dalal badan ayaa caddeynaysa in maalgashiga waxbarashada, shaqo-abuurka iyo horumarinta awoodda dhallinyarada uu saldhig u noqdo dib u dhiska qaranka iyo koboca mustaqbalka. Labo tusaale oo caan ah ayaa arrintaas si fiican u muujinaya:

### 1. RWANDA (XASUUQII 1994)

Rwanda waxay soo martay mid ka mid ah masiibooyinkii ugu xumaa ee taariikhda casriga ah, iyadoo xasuuqii dhacay sannadkii 1994-kii lagu dilay boqollaal kun oo qof, halka hay'adihii dowladnimo, adeegyadii bulshada iyo dhaqaalihii dalkuna ay si weyn u burbureen.

Dib u soo kabashada Rwanda waxaa saldhig u ahaa qorshayaal qaran oo istiraatiiji ah sida Vision 2020 iyo Vision 2050, kuwaas oo mudnaanta siiyay dib u heshiisiinta bulshada, horumarinta aqoonta iyo maalgelinta tiknooloojiyada. Dowladda Rwanda waxay si gaar ah xoogga u saartay kobcinta awoodda dhallinyarada iyo dhismaha dhaqaale ku saleysan aqoon iyo hal-abuur. Natiijada ka dhalatay dadaalladaas waxaa ka mid ah horumarinta xarumo casri ah sida Kigali Innovation City, kororka xirfadaha tiknooloojiyada ee dhallinyarada, iyo koboc dhaqaale oo Rwanda ka dhigay mid ka mid ah dalalka Afrika ee sida xawliga ah ugu horumaraya dhanka adeegyada dhijitaalka ah, hal-abuurka iyo ganacsiga casriga ah.

### 2. KOONFURTA KUURIYA (DAGAALKII KUURIYA 1950–1953)

Dagaalkii Kuuriya ka dib, Koonfurta Kuuriya waxay ka mid ahayd dalalka ugu saboolsan dunida, iyadoo ay burbureen kaabayaashii dhaqaalaha, adeegyadii bulshada iyo nidaamkii waxbarashada. Xilligaas, dhallinyaro badan ayaa wajahaysay xaalado adag oo ay ka mid ahaayeen saboolnimo, shaqo la'aan iyo rajo xumo ku saabsan mustaqbalka.

Dib u soo kabashada Koofurta Kuuriya waxaa horseeday qorshayaal dhaqaale oo muddo dheer socday, gaar ahaan Five-Year Economic Development Plans iyo barnaamijkii Saemaul Undong (Dhaqdhaqaaqa Bulshada Cusub). Dowladda waxay mudnaanta siisay maalgelinta waxbarashada, horumarinta awoodda aadanaha (human capital), iyo kobcinta warshadaha iyo tiknooloojiyada. Sidoo kale, waxay taageero xooggan siisay shirkadaha waaweyn ee dalka sida Samsung iyo Hyundai si ay

u noqdaan matoorrada koboca dhaqaalaha. Natiijadii ka dhalatay dadaalladaas, Koonfurta Kuuriya waxay ka baxday faqriga waxayna isu beddeshay mid ka mid ah dalalka ugu dhaqaalaha horumarsan dunida, halka dhallinyaradeeduna maanta hormuud ka yihiin tiknooloojiyada, hal-abuurka iyo dhaqanka casriga ah ee caalamka, oo ay ka mid yihiin warshadaha K-Pop iyo tiknooloojiyada casriga ah.

## XALALKA IYO JIDKA TOOSAN EE MUSTAQBALKA SOOMAALIYA

Si dhallinyarada Soomaaliyeed ee muujiyay dadaalka, adkaysiga iyo hal-abuurka weyn loogu xiro fursadaha caalamiga ah, loogana gudbo caqabadaha hortaagan, waxaa lagama maarmaan ah in la qaado tillaabooyin qaran oo istiraatiiji ah. Qodobada ugu muhiimsan waxaa ka mid ah:

1. Siyaasadda Qaran ee Shaqaalaynta iyo Fursadaha: Dowladda Soomaaliya waa inay dejisaa qorshe qaran oo ku dhiirrigeliya hay'adaha caalamiga ah, Qaramada Midoobay iyo NGO-yada inay mudnaan siiyaan dhallinyarada Soomaaliyeed ee u qalma boosaska hoggaamineed iyo kuwa farsamo, halkii si joogto ah dibadda looga keeni lahaa shaqaale.

2. Aasaaska Xarumaha Taageerada Caafimaadka Maskaxda: Waa in dalka laga hirgeliyo xarumo iyo adeegyo taageera caafimaadka maskaxda, si looga caawiyo dhallinyarada la tacaalaysa niyad-jabka, walaaca iyo saameynta nafsiyeed ee ka dhalatay burburka, saboolnimada iyo amni darrada.

3. Xiriirinta Maaliyadeed ee Caalamiga ah: Dowladda iyo Bangiga Dhexe waa inay dardar geliyaan dib u habaynta hannaanka maaliyadda si Soomaaliya ugu xiranto nidaamyada maaliyadeed ee caalamiga ah, loona fududeeyo dhallinyarada helitaanka maalgelin, ganacsi iyo adeegyada lacag bixinta ee caalamiga ah.

4. Maalgashiga Dhaqaalaha Dhijitaalka ah: Waa in dowladda iyo hay'adaha waxbarashadu xoogga saaraan horumarinta xirfadaha casriga ah ee dhallinyarada, si ay uga faa'iidaystaan fursadaha shaqo iyo ganacsi ee caalamiga ah iyagoo adeegsanaya tiknooloojiyada, iyo shaqooyinka fog (remote work).

Ugu dambayn, dhallinyarada Soomaaliyeed ma aha kuwo tabar yar ama karti yari haysato; waa jiil muujiyay adkaysi, hal-abuur iyo karti uu ku wajahayo duruufihii ugu adkaa ee dalku soo maray. Inkastoo ay ku koreen xaalado adag, haddana waxay sii wadeen raadinta aqoon, shaqo iyo horumar. Haddii la helo hoggaan leh aragti fog, nidaam hufan iyo maalgashi dhab ah oo lagu sameeyo awoodda dhallinyarada, waxay awood u leeyihiin inay noqdaan hormuudka dib u dhiska dalka, isla markaana dib u soo celiyaan maamuuskii iyo sumcaddii Soomaaliya ku lahayd fagaarayaasha caalamka.

**W/Q** : Cabdijabaar Maxamed "Farma"



# DASTUUR MISE HOGGAAMIYE?

## MARKA HAY'ADUHU DACIIFAAN OO TALADU KU URURTO HAL QOF



Sakariya Axmed Maxamed (Rabiic)




**Xigashada Sawirka**: AI Gen

Waxaa jira su'aal ay ummaduhu marar badan la kulmaan xilliyada kala guurka siyaasadeed: ma waxaa badbaadinaya dastuur iyo hay'ado adag, mise hoggaamiye xooggan oo go'aan qaata? Su'aashani ma aha mid cusub, mana aha mid Soomaaliya ku kooban. Waa su'aal soo martay ilbaxnimooyin badan, boqortooyooyin waaweyn, iyo jamhuuriyado ku faani jiray xorriyad iyo dawladnimo.

Taariikhdu waxay ina tusaysaa in ummaduhu mararka qaarkood ka daalaan muranka siyaasadeed, gaabiska hay'adaha, iyo khilaafaadka joogtada ah, dabadeedna ay qalbigooda iyo rajadoodaba ku wareejiyaan hal hoggaamiye oo ay u arkaan badbaadiye. Halkaas ayayse ka bilaabata khatarta ugu weyn ee dawladnimada: marka kalsoonida shacabka laga wareejiyo hay'adaha oo lagu ururiyo qof keliya.

Falsafad-yahankii Faransiiska ahaa Montesquieu wuxuu qoray oraah noqotay tiirka ugu muhiimsan ee dawladaha casriga ah:

"Qof kasta oo awood haystaa wuxuu u janjeeraa inuu ku takri falo awooddaas; wuxuuna sii wadaa ilaa uu la kulmo xuduud hor istaagta."

Oraahdani waxay saldhig u noqotay mabda'a kala qaybinta awoodaha ee maanta lagu yaqaan dawladaha dastuuriga ah. Fikradda aasaasiga ahi waa mid sahlan: haddii awoodda lagu ururiyo hal qof, hal xisbi, ama hal hay'ad, waxaa lama huraan noqota in xorriyaddu yaraato, sharciguna daciifo.

Dhibaatadu ma aha in hoggaamiyaha laftiisu xun yahay. Dhibaatadu waa in bini'aadamku yahay bini'aadam. Sidaas darteed ayay dawladaha casriga ahi ugu dhisnaadeen mabda'a ah in qofna aan lagu aaminin awood aan xad lahayn, xitaa haddii uu yahay qof wanaagsan.

Laakiin fikirkan kuma koobna reer galbeedka. Qarniyo ka hor, mufakirkii Muslimka ahaa Cabdirraxmaan Al-Kawaakibi wuxuu buuggiisii Tabaa'ic Al-Istibdaad ku qoray: "Kelitalisnimadu ma kharribto siyaasadda oo keliya; waxay kharribtaa akhlaaqda, diinta, cilmiga iyo maskaxda bulshada."

Al-Kawaakibi wuxuu aaminsanaa in dhibaatada ugu weyn ee kelitalisnimadu aysan ahayn xabsiyada iyo cabburinta muuqata oo keliya, balse ay tahay inay bulshada ka disho hal-abuurka, fikirka madax-bannaan iyo dareenka mas'uuliyadda. Marka ummaddu muddo dheer ku noolaato nidaam aan xisaabtan lahayn, waxay la qabsataa aamusnaanta, cabsi iyo ku tiirsanaanta talada hal qof.

Sidoo kale, Ibn Taymiyyah wuxuu yiri: "Ilaahay wuxuu taageeraa dowlad caddaalad ku dhisan xitaa haddii aysan Muslim ahayn, mana taageero dowlad dulmi ku dhisan xitaa haddii ay Muslim tahay."

Oraahdan gaaban waxay xambaarsan tahay xikmad siyaasadeed oo qoto dheer. Jiritaanka dawladnimadu kuma xirna keliya diinta ama hal-ku-dhegyada siyaasadeed ee la qaato, balse waxay ku xirantahay caddaaladda, isla xisaabtanka iyo ilaalinta xuquuqda bulshada.

Taariikhda siyaasadda adduunka waxaa ku badan tusaalooyin muujinaya sida ummaduhu ugu wareegeen shakhsiyaad xooggan markii ay daciifeen hay'adihii. Jamhuuriyaddii Roomaanka waxay lahayd goleyaal, sharciyo iyo nidaam muddo qarniyo ah shaqaynayay. Hase yeeshee markii khilaafkii siyaasadeed batay, dagaalladii sokeeyana kordheen, dadkii Roomaanku waxay si tartiib ah ugu wareejiyeen awooddii Julius Caesar iyagoo rajaynaya inuu soo celin doono kala dambaynta. Wuxuu keenay xasillooni muddo gaaban ah, laakiin geeridii jamhuuriyadda ayaa ahayd qiimihii lagu bixiyay.

Qarnigii labaatanaad, Jarmalkii Weimar wuxuu lahaa dastuur iyo hay'ado dimuqraadi ah. Si kastaba ha ahaatee, qalalaasihii dhaqaale, shaqo la'aantii iyo jahawareerkii siyaasadeed waxay dadka ku qanciyeen in xal lagu heli karo hoggaamiye adag. Sidaas ayuu Adolf Hitler ku helay awood sharci ah, dabadeedna awooddaas ayuu ku burburiyay hay'adihii sharciyadda siinayay.

Hannah Arendt oo ka mid ahayd mufakiriintii ugu waaweynaa ee daraaseeyay nidaamyada kelitaliska ah waxay qortay: "Dadka ma jecla kelitalisnimada marka hore; waxay jecel yihiin amniga. Kelitalisnimadu waxay dhalataa marka amniga loo huro xorriyadda."

Oraahdani waxay si gaar ah u taabanaysaa bulshooyinka kasoo kabanaya dagaallada iyo fowdada. Marka ay dadka ka daalaan hubka, colaadaha iyo hubanti la'aanta, waxay mararka qaar diyaar u noqdaan inay qayb ka mid ah xorriyaddooda ku beddeshaan ballanqaad amni iyo kala dambayn ah.

Soomaaliya waxay casharkan si qadhaadh u soo martay dhammaadkii lixdamaadkii, jamhuuriyaddii rayidka ahayd waxay la daalaa dhacaysay musuqmaasuq, kala qaybsanaan siyaasadeed iyo tabar-darro hay'adeed. Dilkii madaxweyne Cabdirashiid Cali Sharmaarke iyo jahawareerkii siyaasadeed ee xigay waxay abuureen jawi ay dad badani ku qanceen in ciidanku yahay badbaadada qaranka.

Sidaas ayay ku dhalatay dowladdii militariga ahayd ee 1969.

Bilowgii, taliskaasi wuxuu helay taageero ballaaran. Wuxuu ku yimid magaca la dagaallanka musuqmaasuqa, ciribtirka qabyaaladda, mideynta qaranka iyo dhismaha dawlad adag. Waxaa la qoray afka Soomaaliga, waxaa la hirgeliyey ololihii farbarashada, waxaana la dhisay mashaariic badan oo dowladeed. Dad badan ayaa rumaysnaa in Soomaaliya gashay marxalad cusub oo dawladnimo iyo horumar ah.

Laakiin dhibaatadu waxay bilaabatay markii awooddii qaranka si tartiib tartiib ah ugu ururtay hal xarun iyo hal hoggaan. Xisbiyadii siyaasadeed waa la mamnuucay, saxaafaddii madaxbannaanayd waa la xiray, mucaaradkii waxaa loo aqoonsaday cadow qaran, halka hay'adihii dowladdana laga dhigay kuwo ku tiirsan rabitaanka madaxa sare ee taliska.

Muddo ka dib, dadku waxay bilaabeen inay ku kalsoonaadaan shakhsiga xukunka haya halkii ay ku kalsoonaan lahaayeen hay'adaha. Taasi waa calaamadda ugu weyn ee nidaam kasta oo si kelitalis ah ku bilowda.

Markii dagaalladii, dhibaatooyinkii dhaqaale iyo khilaafaadkii siyaasadeed isa soo tarayeen, ma jirin hay'ado madaxbannaan oo awood u leh inay saxaan khaladaadka ama maareeyaan kala-guurka. Dawladnimadii oo dhan waxay ku tiirsanayd hal xarun. Markii xaruntaasi daciiftayna, nidaamkii oo dhan ayaa wada dumay.

Burburkii 1991 ma ahayn oo keliya burburka xukuumad; wuxuu ahaa burburka hay'ado muddo labaatan sano ka badan lagu tababaray inay amar ka sugaan hal meel. Markii meeshaas la waayay, hay'adihii ma awoodin inay sii shaqeeyaan.

Waxaa laga yaabaa in tani tahay casharka ugu qaalisan ee ay Soomaalidu ka dhaxashay waayihii militariga. Dhibaatadu ma ahayn oo keliya qofkii xukumayay; dhibaatadu waxay ahayd in awoodda qaranka oo dhan lagu ururiyay qof iyo koox yar, halkii lagu qaybin lahaa hay'ado awood isku dheellitiran leh.

James Madison, oo ka mid ahaa aas-aasayaashii dastuurka Maraykanka, wuxuu yiri:

"Haddii dadku malaa'ig ahaan lahaayeen, dawlad looma baahdeen; haddii kuwa xukuma ay malaa'ig ahaan lahaayeena, xakameyn looma baahdeen."

Madison wuxuu xusuusinayaa xaqiiqo muhiim ah: dawladnimada wanaagsan laguma dhiso kalsoonida lagu qabo shakhsiga, balse waxaa lagu dhisaa nidaam awoodda xaddidaya.

Dastuurku ma aha warqad lagu qoro qodobbo sharci ah oo keliya. Waa heshiiska ugu weyn ee bulshada dhexdeeda ka jira. Waa xadka kala saaraya awoodda dawladda iyo xuquuqda shacabka. Marka dastuurka loo arko qalab lagu gaaro dano siyaasadeed oo ku meel gaar ah, waxaa dhaawacma kalsoonidii guud ee nidaamka.

Waxaa laga yaabaa in hoggaamiye xooggan uu mararka qaar xalliyo mushkilado degdeg ah. Waxaa laga yaabaa inuu gaaro go'aanno aysan hay'adaha kala duwan si dhakhso leh u gaari karin. Laakiin su'aasha muhiimka ahi waa: maxaa dhacaya marka hoggaamiyahaasi tago? Haddii jawaabtu tahay in nidaamkii oo dhan burburo, markaas dhibaatada lama xallin ee waa la dib dhigay.

Soomaaliya maanta waxay mar kale taagan tahay meel u baahan feejignaan siyaasadeed. Inkastoo duruufuhu ka duwan yihiin kuwii 1969, haddana waxaa muuqda calaamado taariikhdu nagu khasbayso inaan si taxaddar leh u eegno: marka awooddu ku ururto xarun keliya, marka hay'adaha madaxbannaan la wiiqo, marka dastuurka loo fasiro si uu ugu adeego dan siyaasadeed oo gaar ah, ama marka mucaaradka loo arko khatar halkii loo arki lahaa qayb dabiici ah oo nidaamka ka tirsan.

Khatarta ugu weyn ee Soomaaliya maanta ma

aha oo keliya inay ku noqoto fowdo; khatarta kale ee dhabta ahi waa inay mar labaad ku qanacdo in badbaadadu ku jirto gacanta hal hoggaamiye oo ka sarreeya hay'adaha iyo dastuurka. Taariikhdu waxay ina bartay in waddadaas lagu heli karo xasillooni ku meel gaar ah, balse ay marar badan ku dhammaato cabburin siyaasadeed iyo qalalaase cusub.

Al-Kawaakibi wuxuu mar kale ina xusuusinayaa:

"Kelitalisnimadu waxay ka bilaabataa marka ummaddu aamusto, waxayna dhammaataa marka ummaddu garato in qofna aanu ka sarreyn sharciga."

Sidaa darteed, su'aasha saxda ahi ma aha "yaa dalka badbaadinaya?" Su'aasha saxda ahi waa: "Maxaa dalka badbaadinaya?"

Taariikhdu waxay si joogto ah u bixinaysaa jawaab isku mid ah: hay'ado adag, sharci la wada ixtiraamo, awood la xaddiday, iyo dastuur ka sarreeya qof kasta.

Ummaduhu waxay waayaan xorriyaddooda marka ay rumaystaan in hoggaamiye keli ahi ka muhiimsan yahay dastuurka. Waxayna helaan xasillooni waarta marka ay rumaystaan in dastuurku ka sarreeyo hoggaamiyaha.

Taasi waa farqiga u dhexeeya dawlad ku nool qof iyo dawlad ku nool qaanuun. Qofku wuu yimaadaa wuuna tagaa; laakiin hay'adaha iyo dastuurku way sii noolaadaan, qarankuna wuu sii noolaanayaa. Haddii se hay'adaha lagu beddelo shakhsiyaad, taariikhdu waxay mar kasta ina tusaysaa in burburku uun dib u dhacayo, balse aanu baaba'ayn.

## TIXRAACYADA


1. Montesquieu, The Spirit of the Laws (1748).
2. Hannah Arendt, The Origins of Totalitarianism (1951).
3. James Madison, The Federalist Papers, No. 51.
4. الرحمن الكواكبي، طبائع الاستبداد ومصارع الاستعباد .
5. ابن تيمية، مجموع الفتاوى.
6. ابن خلدون، المقدمة.
7. I.M. Lewis, A Modern History of Somalia.
8. Ahmed I. Samatar, Socialist Somalia: Rhetoric and Reality.

# SHIIKH MADAR AXMED SHIRWAC (1825–1918):



Dr. Cabdiraxmaan Baadiyow



**Xigashada Sawirka**: Wikipedia

Dariiqada Qaadiriyadu waxay kasoo bilaabatay magaalada Baqdaad, waxaana aasaasay Shiikh Cabdulqaadir Jeylaani (wuxuu geeriyooday 1166 Miilaadiga). Dariiqadani waxay gaartay gobollada galbeed iyo waqooyi ee Soomaaliya horraantii qarnigii 16-aad, iyada oo uu faafiyey Abubakar bin Cabdalla Al-Caydaruus (wuxuu geeriyooday 1502 Miilaadiga) oo ka soo jeeday Xadramawt ee Yemen. Qaadiriyadu waxay si weyn ugu hanaqaadday magaalada taariikhiga ah ee Harar, oo loo aqoonsanaa xarunta ugu weyn ee Islaamka Geeska Afrika. Harar waxay soo jiidan jirtay Soomaali badan oo u tegi jiray deegaan ahaan iyo waxbarasho, taasoo ka dhigtay xarun caan ku ah culuumta Islaamka. Hase yeeshee, magaalada waxaa haleelay qalalaase markii ay Itoobiya qabsatay sannadkii 1887-dii, ka dib markii Masaaridu si lama filaan ah uga baxeen, iyaga oo cadaadis kala kulmay dhaqdhaqaaqii Mahdiga ee Suudaan.

Duullaankaasi wuxuu sababay masiibooyin ay ka mid ahaayeen dilal loo geystay dadkii iyo culimadii magaalada, xiritaanka xarumihii waxbarashada, iyo xadgudub lagu sameeyay goobihii barakaysnaa ee Muslimiinta. Intii lagu jiray muddadaas adag, Boqor Menelik ee Itoobiya wuxuu si kibir leh ugu dhawaaqay qabsashadiisa Harar, isaga oo iska indhatiray taariikhdeeda iyo dhaxalkeeda Islaamiga ah. Mid ka mid ah natiijooyinkii duullaankaasi wuxuu noqday in qaar ka mid ah culimadii ka badbaaday ay u hayaamaan meelo ka fog Harar. Sidaas darteed, Jigjiga ayaa noqotay xarun cusub oo kobcaysa oo waxbarashada Islaamka ah, iyadoo beddeshay kaalintii Harar. Culimadii Qaadiriyada ee caanka ka ahayd Jigjiga waxaa ka mid ahaa: Shiikh Cabdiraxmaan Axmed Gole, Shiikh Cumar Al-Azhari, Shiikh Cabdalla Al-Qutbi, Shiikh Cabdisalaam Xaaji Jaamac, Shiikh Maxamuud Macallin Cumar iyo kuwo kale.

Labada shiikh ee ugu caansanaa, Shiikh Cabdiraxmaan Al-Zaylaci iyo Shiikh Cabdisalaam Xaaji Jaamac, waxay saldhigyo ka kala sameysteen Jigjiga iyo Qulunqul. Shiikh Al-Zaylaci wuxuu xoogga saaray fidinta dariiqada Qaadiriya, halka Shiikh Cabdisalaam Xaaji Jaamac uu Jigjiga ka aasaasay xarun waxbarasho oo Islaami ah. Xarumahaas iyo laamahoodii ayaa si wadajir ah u faafiyey waxbarashada Islaamka iyo dariiqada Qaadiriya dhammaadkii qarnigii 19-aad iyo bilowgii qarnigii 20-aad. Waxaa sidoo kale la aasaasay xarumo waxbarasho oo badan oo ku kala yaalla galbeedka iyo waqooyiga Soomaaliya, kuwaas oo ay ugu caansanayd xaruntii "Jamaac Al-Kabiir" ee uu dhisay Shiikh Madar Axmed Shirwac, aasaasaha Hargeysa.

Shiikh Madar Axmed Shirwac waxaa lagu xusuustaa inuu ahaa shiikh suufi ah, dib-u-habeeye bulsho iyo faqiih sharci yaqaan ah. Wuxuu ku dhashay deegaanka Hedayta ee u dhow Berbera, isaga oo ka soo jeeday qoys reer guuraa ah. Wuxuu Qur'aanka ku xafiday yaraantiisii dugsi Qur'aan oo guurguura, kaas oo la socon jiray socdaallada xilliyada ee reer guuraaga. Berbera, oo ahayd deked ganacsi oo xiriir dhow la lahayd Harar, waxay ahayd marin ay si joogto ah ugu kala gooshi jireen culimo, arday iyo ganacsato. Magaalada Harar waxay ahayd xarunta ugu weyn ee waxbarashada Islaamka, halka Berbera ahayd xarunta ganacsiga gobolka. Markii Ingiriisku qabsaday Cadan sannadkii 1839-kii, Berbera waxay noqotay il muhiim ah oo xoolo loogu dhoofiyo ciidamada Ingiriiska ee Cadan, taasoo kordhisay dhaqaalaha ganacsatada xoolaha iyo xiriirka ganacsi ee Berbera iyo Harar.

Sidaas darteed, Soomaali badan ayaa u guuray Harar si ay uga ganacsadaan ama wax uga bartaan. Sannadkii 1855-tii, waxaa Harar ku noolaa qiyaastii 2,500 Soomaali ah, kuwaas oo qayb weyn ka ahaa dadweynaha magaalada. Waxaa xusid mudan in laba ka mid ah saddexdii shiikh ee ugu waaweynaa Harar ay Soomaali ahaayeen: Shiikh Cabdisalaam Xaaji Jaamac iyo Kabir Khaliil, kaas oo la rumaysan yahay inuu asal ahaan ka soo jeeday deegaanka Berbera. Si ka duwan habka waxbarasho ee Soomaaliya inteeda kale, halkaas oo bulshada deegaanka ay taageeri jirtay ardayda (jilidda Xerta), ardayda Harar waxay ahayd inay iyagu iska bixiyaan kharashaadka nolosha iyo agabka waxbarashada. Tani waxay adkaynaysay in dadka saboolka ahi helaan waxbarasho. Aabbihii Shiikh Madar, oo ahaa ganacsade xoolaad oo hodan ah, ayaa maalgeliyay waxbarashadiisa Harar.

Muddo ka badan 20 sano ayuu Shiikh Madar wax ku bartay Harar, ilaa uu ka noqday caalim caan ah iyo hoggaamiye Qaadiri ah. Macallinkiisii Kabir Khaliil ayaa u diray inuu dalkiisa ku noqdo si uu u faafiyo diinta Islaamka, u xoojiyo dariiqada Qaadiriya, ugana shaqeeyo xalinta khilaafaadka qabiilka ee carqaladayn jiray ganacsiga Berbera iyo Harar. Markii uu dalkiisii ku soo noqday, Shiikh Madar wuxuu sannadihii 1860-meeyadii aasaasay xarunta "Jamaac Al-Kabiir." Wuxuu isu keenay culimadii deegaanka, wuxuuna hoy u dhisay xertiisa. Sannadkii 1883 ayuu dhisay masaajidkiisii weynaa ee Hargeysa, kaas oo weli taagan maanta.

Tani waxay bilow u noqotay kororka waxbarashada Islaamka iyo hirgelinta shareecada Islaamka ee bulshada dhexdeeda.

Waxa kale oo la bilaabay dadaallo lagu xoojinayo nabadda iyo heshiisiinta qabaa'ilka is haya. Waxaa taageeray culimo kale oo Harar kala soo noqday, sida Shiikh Haaruun Shiikh Cali iyo Xaaji Faarax Ismaaciil oo loo diray Berbera iyo Bulaxaar si ay dadka diinta u baraan. Shiikh Axmed Boon ayaa loo diray Berbera, halka Shiikh Kabir Cumar loo diray Bulaxaar. Khibraddii uu ka soo qaatay Harar awgeed, Shiikh Madar wuxuu hirgeliyay dib-u-habaynno waaweyn oo lagu beddelayo nolosha reer guuraaga.

Dib-u-habayntii ugu horreysay waxay ahayd dejinta dadka, iyadoo laga guurayo hab nololeedkii reer guuraaga ee ku dhisnaa guuritaanka joogtada ah. Ujeeddadu waxay ahayd in la abuuro xasillooni iyo horumar dhaqaale. Dib-u-habaynta labaad waxay ahayd xoojinta midnimada bulshada. Shiikh Madar wuxuu garwaaqsaday in qabyaaladdu kala qaybiso bulshada, sidaas darteed wuxuu ku dadaalay in dadka lagu mideeyo ku xidhnaanshaha dariiqada Qaadiriya iyo qiyamka ruuxiga ah ee wadajirka ah. Dib-u-habaynta saddexaad waxay ahayd dhiirrigelinta beeraha. Isagoo arkay xaddidnaanta dhaqaalaha ku tiirsan xoolo-dhaqashada, wuxuu ku boorriyey dadkiisa inay beero fashaan si loo helo sugnaanta cuntada iyo koboc dhaqaale. Bulshooyinkii beeraha ku dhisnaa ee uu ka aasaasay Hargeysa, Gebiley iyo Boorama ayaa ilaa maanta markhaati u ah aragtidiisii fogayd ee ahayd in reer guuraaga loo beddelo bulshooyin deggan oo wax soo saar leh. Wuxuu doonayay in la kala duwo ilaha dhaqaalaha lana yareeyo ku tiirsanaanta xoolo-dhaqashada oo mararka qaar nugul.

Xilligii Shiikh Madar, waqooyiga Soomaaliya wuxuu hoos imanayey saameynta khilaafadii Cusmaaniyiinta. Shiikh Madar wuxuu xiriir wanaagsan la lahaa Cusmaniyiinta iyo kuwii beddelay ee Masaarida, kuwaas oo qabsaday dekedaha Soomaaliyeed iyo Harar sannadkii 1875. Hase yeeshee, bixitaankii degdegga ahaa ee Masaarida ayaa abuuray firaaqo siyaasadeed oo Itoobiya ka faa'iidaysatay markii ay qabsatay Harar sannadkii 1887-dii. Duullaanka Itoobiya wuxuu khatar weyn ku noqday qabaa'ilkii Soomaaliyeed ee kala qaybsanaa. Sidaa darteed, Shiikh Madar wuxuu si degdeg ah uga codsaday Ingiriiska inay ka caawiyaan ka hortagga Itoobiya.


Nasiib darro, Ingiriisku wuxuu xiriir wanaagsan la lahaa boqortooyadii Itoobiya ee soo baxaysay, sidaas darteed wuu iska dhego-tiray codsigaas. Soomaalidu, oo markaas ahayd bulshooyin kala qaybsan oo aan lahayn dawlad dhexe, waxay wajahday laba khatarood: Isballaarinta Itoobiya ee galbeedka iyo gumaysiga Ingiriiska ee bariga. Maadaama aysan jirin hoggaan siyaasadeed oo mideeya bulshada, Soomaalidu waxay u aragtay maamulka Ingiriiska inuu ka dhib yar yahay xukunka Itoobiya. Sababta ugu weyn waxay ahayd in Itoobiyaanku si joogto ah u dhacaan xoolaha Soomaalida si ay ugu quudiyaan ciidamadooda, halka Ingiriisku uu Berbera ka sameeyay suuq xoolaha Soomaaliyeed loo dhoofiyo, taasoo dadka deegaanka u abuurtay fursado dhaqaale.

Waxaa lagu tilmaami karaa Shiikh Madar inuu tusaale u yahay doorkii taariikhiga ahaa ee culimada Soomaaliyeed ka qaateen dhismaha bulsho deggan, waxbarata, isla markaana leh wax-soo-saar beereed ka hor imaanshihii gumaysiga. Isagoo adeegsanaya hoggaamin diimeed iyo aragti fog, wuxuu dadka ku dhiirrigeliyey deganaansho, waxbarasho, nabad iyo beerasho, kuwaas oo ahaa tiirarka horumarka bulshada. Dhab ahaantii, xadaaraddu waxay ka bilaabataa deganaansho iyo beero, maadaama bulsho deggan oo leh wax-soo-saar joogto ahi ay saldhig u noqoto koboca aqoonta, ganacsiga iyo hay'adaha bulshada. Shiikh Madar wuxuu aragtidaas ku hirgeliyey deegaannadii uu ka shaqaynayey, isagoo dhaxal uga tegay bulshooyin deggan oo wax-soo-saar leh.

Dhaxalkii Shiikh Madar wuxuu si muuqata uga dhex ifayaa magaalada Hargeysa, oo uu aasaaskeeda door weyn ku lahaa, iyo masaajidkiisii weynaa oo weli taagan maanta, kana mid ah astaamaha taariikhiga ah ee magaalada. Labaduba waxay markhaati u yihiin aragtidiisii fogeyd, dadaalkiisii dib-u-habaynta bulshada, iyo doorkiisii ku aaddanaa fidinta diinta, waxbarashada iyo dejinta bulshada Soomaaliyeed.

**W/Q:** Dr. Cabdiraxmaan Baadiyow

# GARSOORKA SOOMAALIYA EE SADDEXDA TIIR KU TAAGAN



Maxamuud Bashiir Jaamac
(Mawel)




Xigashada Sawirka: AI

# HORDHAC

Soomaaliya waxay leedahay nidaam sharci oo gaar u ah marka loo eego dalal badan oo adduunka ka mid ah. Halka dalal badan ay ku tiirsan yihiin hal nidaam sharci oo rasmi ah, Soomaaliya waxaa si wadajir ah uga jira saddex nidaam oo waaweyn oo muddo dheer saamayn ku lahaa nolosha bulshada, kuwaas oo kala ah Shareecada Islaamka, Xeer Dhaqameedka iyo Qaanuunka Dowladda. Saddexdan nidaam ayaa si toos ah ama si dadban u saameeya habka lagu xalliyo khilaafaadka, lagu ilaaliyo kala dambaynta, laguna hago xiriirka bulshada.

Inkasta oo nidaamyadani ay mararka qaar iska kaashadaan xallinta arrimaha bulshada, haddana waxaa jira xaalado ay ku kala aragti duwan yihiin habka wax loo maareeyo. Sidaas darteed, fahamka doorka, awoodda iyo heerka dhaqan-galka ee mid kasta ayaa muhiim u ah dhismaha dowladnimo ku dhisan caddaalad, xasillooni iyo sharciyad bulsho.

## SHAREECADA ISLAAMKA: SALDHIGGA SHARCI EE UGU SARREEYA

Shareecada Islaamku waa nidaamka ugu sarreeya ee sharci ee dalka Soomaaliya. Waa nidaam uu Alle SWT u dejiyey bani'aadamka si loogu hago jidka toosan, looguna xaqiijiyo caddaalad, sinnaan iyo wanaag. Shareecadu kuma koobna oo keliya arrimaha cibaadada, balse waxay hagtaa dhammaan dhinacyada nolosha, sida qoyska, dhaqaalaha, maamulka, garsoorka, siyaasadda iyo xiriirka bulshada.

Muhiimadda shareecada waxaa sii xoojinaya Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kaas oo Qodobkiisa 4-aad ku caddeeyey in Shareecada Islaamku tahay sharciga ugu sarreeya dalka, isla markaana aan la samayn karin sharci ka hor imanaya mabaadi'deeda.

Bulshada Soomaaliyeed oo Muslim ah una aragta shareecada waajib diini ah ayaa si weyn ugu dheggan ku dhaqankeeda. Taasi waxay sababtay in culimada iyo xarumaha diintu ay door muuqda ku yeeshaan xalinta murannada bulshada iyo bixinta talooyinka sharciyeed ee la xiriira arrimaha nolol maalmeedka. Aqbalaadda ballaaran ee bulshada dhexdeeda ka jirta ayaa shareecada ka dhigaysa nidaamka ugu saamaynta badan marka la eego kalsoonida shacabka.

## XEER DHAQAMEEDKA: DHAXALKA SHARCI EE BULSHADA SOOMAALIYEED

Xeer dhaqameedku waa nidaam sharci oo soo jireen ah, kuna dhisan hiddaha, dhaqanka iyo waaya-aragnimada bulshada Soomaaliyeed. Qarniyo badan ka hor intii aysan jirin dowlad dhexe ama maxkamado rasmi ah, xeer dhaqameedku wuxuu ahaa habka ugu weyn ee lagu maareeyo xiriirka bulshada laguna xalliyo khilaafaadka.

Xeerkani wuxuu si gaar ah uga shaqeeyaa arrimaha la xiriira nabadgelyada, heshiisiinta, magta, xalinta murannada beelaha iyo dib-u-heshiisiinta bulshada. Odayaasha iyo cuqaasha dhaqanka ayaa ah tiirarka ugu muhiimsan ee hirgeliya xeerkan, iyagoo adeegsanaya khibrad, aqoon bulsho iyo faham qoto dheer oo ku saabsan xaaladaha deegaanka.

Sababta ugu weyn ee xeer dhaqameedku u sii nool yahay ayaa ah kalsoonida bulshada, fudaydka helitaanka garsoorka iyo awoodda uu u leeyahay inuu bixiyo xal degdeg ah oo lagu qanci karo. Si kastaba ha ahaatee, sida nidaam kasta oo sharci, xeer dhaqameedkuna wuxuu u baahan yahay dib-u-eegis iyo horumarin joogto ah si loo hubiyo inuu waafaqsan yahay mabaadi'da Shareecada Islaamka, xuquuqaha aasaasiga ah ee dadka iyo baahiyaha casriga ah ee bulshada.

## QAANUUNKA DOWLADDA: AASAASKA DOWLADNIMADA CASRIGA AH

Qaanuunka ama sharciga dowladdu waa nidaamka sharci ee ay dejiso dowladda si loo habeeyo maamulka guud ee dalka, loo ilaaliyo xuquuqda muwaadiniinta loona xaqiijiyo kala dambayn iyo isla xisaabtan.

Marka laga hadlayo qaanuunka, waxaa loola jeedaa dhammaan sharciyada rasmiga ah ee dalka ka jira, laga bilaabo Dastuurka oo ah sharciga ugu sarreeya, illaa xeerarka, qawaaniinta iyo amarrada ay soo saaraan hay'adaha kala duwan ee dowladda. Sharciyadani waxay nidaamiyaan xiriirka ka dhexeeya dowladda iyo shacabka, hay'adaha dowladda dhexdooda iyo muwaadiniinta laftooda.

Qaanuunka waxaa dejisa laanta sharci-dejinta, waxaa fasirta oo dabaqda laanta garsoorka, halka ay fuliso laanta fulintu. Sidaas darteed, qaanuunku waa laf-dhabarta dowladnimada casriga ah, waana

aaladda ugu muhiimsan ee lagu xaqiijiyo maamulka wanaagsan iyo ilaalinta xuquuqda muwaadiniinta.

## CAQABADAHA HORYAALLA HIRGELINTA QAANUUNKA

Inkasta oo qaanuunku yahay tiirka ugu muhiimsan ee dowladnimada, haddana heerka ku dhaqankiisa Soomaaliya weli ma gaarin heerka ay gaareen Shareecada Islaamka iyo Xeer Dhaqameedku. Arrintan waxaa sabab u ah dhowr qodob oo isbiirsaday.

Mid ka mid ah sababaha ugu waaweyn ayaa ah wacyigelin la'aanta bulshada ee ku saabsan muhiimadda qaanuunka iyo doorka uu ku leeyahay ilaalinta xuquuqda muwaadiniinta. Sidoo kale, kakanaanta nidaamka maxkamadaha, dib-u-dhacyada ku yimaadda dacwadaha iyo kharashaadka garsoorka ayaa mararka qaar caqabad ku noqda shacabka doonaya inay adeegsadaan nidaamka rasmiga ah ee garsoorka.

Dhanka kale, qayb ka mid ah bulshada ayaa weli aaminsan in qaar ka mid ah sharciyada dowladdu aanay si buuxda ula jaanqaadin dhaqankooda ama fahamkooda diineed. Kalsooni-darradan ayaa keentay in dad badani door bidaan xallinta khilaafaadka iyagoo adeegsanaya culimada ama odayaasha dhaqanka halkii ay tegi lahaayeen maxkamadaha dowladda.

## ISKU XIRNAANTA SADDEXDA NIDAAM

Inkastoo Shareecada Islaamka, Xeer Dhaqameedka iyo Qaanuunka Dowladda ay yihiin saddex nidaam oo kala duwan, haddana xaqiiqadu waxay tahay inay wadaagaan hal ujeeddo oo ah ilaalinta nabadda, xaqiijinta caddaaladda iyo xallinta khilaafaadka bulshada.

Shareecadu waxay si weyn uga muuqataa arrimaha qoyska sida guurka, furriinka, nafaqada iyo dhaxalka. Xeer dhaqameedkuna wuxuu door muuqda ka ciyaaraa nabadaynta, dib-u-heshiisiinta iyo xalinta murannada bulshada. Qaanuunka dowladduna wuxuu laf-dhabar u yahay maamulka guud ee dalka, sugidda kala dambaynta, ilaalinta amniga iyo nidaaminta arrimaha siyaasadeed iyo maamul.

Sidaa darteed, saddexdan nidaam ma aha kuwo khasab ku ah inay iska hor yimaadaan, balse waxay noqon karaan kuwo is kaabaya haddii si habboon loo habeeyo loona waafajiyo mabaadi'da guud ee caddaaladda.

## JIDKA HORUMARKA: ISWAAFAJIN IYO ISKU-DHEELITIRNAAN

Haddii Soomaaliya doonayso inay dhisto nidaam garsoor oo adag, hufan oo bulshada kalsooni ku qabto, waxaa lagama maarmaan ah in la helo iswaafajin dhab ah oo dhex marta saddexdan nidaam sharci.

Taasi waxay u baahan tahay in Shareecada Islaamka loo aqoonsado saldhigga hagaya nidaamyada kale, in xeer dhaqameedka la casriyeeyo lana waafajiyo qiyamka shareecada iyo xuquuqda aadanaha, isla markaana qaanuunka dowladda loo sameeyo si bulshada loogu qanciyo inuu ka tarjumayo diintooda, dhaqankooda iyo baahidooda nololeed.

Waxaa sidoo kale muhiim ah in la xoojiyo wacyigelinta sharciyeed, kor loo qaado tayada hay'adaha garsoorka, la dedejiyo dacwadaha maxkamadaha, lana fududeeyo helitaanka adeegyada garsoorka si ay dhammaan muwaadiniintu u helaan caddaalad siman.

## GUNAANAD

Saddexda nidaam sharci ee ka jira Soomaaliya—Shareecada Islaamka, Xeer Dhaqameedka iyo Qaanuunka Dowladda—waxay ka tarjumayaan taariikhda, diinta iyo waaqica nololeed ee bulshada Soomaaliyeed. Mid kasta wuxuu leeyahay kaalintiisa iyo goobaha uu ku xooggan yahay, waxaana muuqata in aan midkood si buuxda uga maarmi karin kan kale.

Mustaqbalka Soomaaliya wuxuu ku xirnaan doonaa awoodda lagu abuuri karo nidaam sharci oo isku dheellitiran, kaas oo ka faa'iidaysanaya awoodaha saddexdan nidaam, kana fogaanaya meelaha ay ku kala aragti duwan yihiin. Haddii taas lagu guulaysto, waxaa la heli karaa bulsho ku dhisan caddaalad, xasillooni, kalsooni sharci iyo dowladnimo waarta.

# SABABAHA DHALIYAY CALMAANIYADDA
## QEYBTA 2AAD



Dr. Maxamed Cali Faarax



Xigashada Sawirka: Alharam

# SABABTA 1AAD: XAD-GUDUBKA KANIISADDA

Xad-gudubku sidiisaba waa cudur khatar ah oo burburiya nafta aadanaha, tirtira astaamaheeda wanaagsan, kana dhiga qofka bini'aadamka ah ruux shaydaan ah oo fallaagoobay.

Xad-gudubku waa dulmi, Allena marar badan Quraanka ayuu nagu faray inaan ka fogaanno iskana ilaalinno dulmiga nooc kasta oo uu yahayba (ألا تطغوا في الميزان ـ الرحمن 8), Aayaddanina waxay na faraysaa inaan marka aan dadka wax u miisayno dulmiga ka fogaanno.

Waxa ka mid ah astaamaha cudurkan (xad-gudubka) in saamayntiisu aysan haleelin qof kasta, balse ay ku dhacdo naf tabar daran oo heshay fursado ka weyn awooddeeda iyo miisaankeeda dhabta ah, iyadoo aan lahayn damiir akhlaaqeed ama xakameyn diimeed oo ka celisa xumaanta, hab-dhaqankeedana toosisa.

Sidoo kale, xad-gudubku waa astaan liidnimo; qofka dulmiga sameeyaa wuxuu isku dayayaa inuu ku qariyo ceeb gudaha ka haysata ama uu ku cudurdaarto dhaqan qalloocan oo aan caqliga suubban iyo doodda saxda ahi aqbali karin. Mararka qaarkood, xad-gudubku wuxuu ku bilowdaa waddo si khaldan loo adeegsaday iyadoo dano gaar ah laga leeyahay, balse ugu dambayn wuxuu isu beddelaa cudur burburiya qofka, oo la socda ilaa uu ka geeriyoodo.

Marka xad-gudubku ka yimaado qof madax ah oo gaal ah ama hoggaamiye adduunyo uun daneeya, waxaa laga yaabaa in si uun loo fahmi karo, inkastoo xumaantiisa aan caqli iyo damiir midna raalli ka noqon karin. Hase yeeshee marka xad-gudubkaasi ka yimaado rag ay dadku u arkaan kuwo dahiran oo nadiif ah, rasuullo nabadeed iyo kuwo aakhiro doon ah, arrintaasi waa mid nafta ku culus oo ay adag tahay in la aqbalo, gaar ahaan haddii ay yihiin wadaaddo diineed oo kalgacalka iyo maxabbadu tahay hal-ku-dheggooda, dulqaadkuna astaantooda, kuwaas oo dadka ku yiraahda:

***'Qofkii dhabanka midig kaa dharbaaxa, kan kale u jeedi, sidoo kale; kii doonaya inuu dacwad iyo dood kula galo si uu maryahaaga u qaato, khamiiskaagana u daa; kii kugu khasba inaad mayl la socoto, laba mayl la soco'".***

Haddii aan milicsanno dabeecadda wadaaddada Kaniisadda, waxaa muuqata inay ahaayeen kuwo ka horreeya casrigii ay noolaayeen dhinaca is-maamulka; maaddaama ay ahaayeen hay'ad nidaamsan oo si xeeldheer oo isku xiran loo dhisay, lehna saldhig ballaaran oo ku fidsan dhammaan gobollada iyo meelaha fog-fog ilaa heerka ugu sarreeya ee maamulka oo xaruntiisu ahayd Rome, astaantani waxay siisay awood joogto ah oo aan si fudud loola tartami karin iyo xididdo qoto dheer oo ay adag tahay in la rujiyo.

Sidaas darteed, waxaan aragnaa in boqorro badan oo isku dayay inay kaniisadda ka hor yimaadaan ay mar walba ku fashilmayeen la dagaallankeeda, ugu dambayna ay si liidata u aqbalayeen inay hoos tagaan saameynteeda. Sidoo kale, dunidii Masiixiga ahayd ee reer Galbeedku kama aysan bixi karin gacanta adag ee kaniisadda ilaa uu dhacay kacdoon gudaha ah oo ay hoggaaminayeen dib-u-habeeyayaashii (islaaxiyiintii) kaniisadda dhexdeeda, taas oo sababtay in uu daciifo qaab-dhismeedkii nidaamka iyo awooddii dhexe, isla markaana ay kala daadato daacadnimadii iyo isku xirnaantii dadka.

Xad-gudubka Wadaaddada Kaniisaddu waxay haraysay nolosha dadkii masiixiyiinta ahaa ee xilliyadaas joogay, gaar ahaa dadkii ku hoos noolaa boqortooyadii Roomaaniyiinta, qooqa kaniisadduna wuxuu saameeyey dhinacyo badan oo ay ka mid yihiin:

## 1. XAD-GUDUBKA DHINACA DIINTA

Tan iyo markii ay soo baxday waxa loo yaqaanay Masiixiyadda rasmiga ah ee lagu ansixiyey shirkii koowaad ee golaha Nicaea sanadkii 325 Miilaadiga, kaniisaddu waxay ku dhaqmeysay xad-gudub diineed iyo cabburin aad u fool xun. Waxay xoog iyo qasab ku faafisay caqiidada saddexleyda (Trinity - الثالوث) oo ah inay jiraan saddex Ilaah oo koonka wada maamula (Alle SWT, Nebi Ciise iyo Ruuxul-Qudus), waxayna xaaraantimeysay oo lacnadday cid kasta oo ka hor timaadda caqiidadaas.

Intaas kuma ekaan, ee waxay daadisay dhiigga kuwii Muwaxidiinta (الموحدون) ahaa ee ay gacanta ku dhigtay, waxayna marsiisay noocyo kala duwan oo jirdil iyo ciqaab ah. Iyadoo adeegsanaysa waxa loo yaqaan shirarka barakaysan, waxay isu taagtay maqaam Ilaahnimo oo ay wax bannayn karto ama xaaraantinimeyn karto, waxna ku dari karto ama beddeli karto kitaabka Muqaddaska ah, iyadoo aan qofna loo oggolayn inuu diido ama xitaa aragtidiisa cabbiro, qofkuu doono ha ahaadee. Qofkii ka horyimaadana waxaa sugayay cayrin, habaar iyo in lagu tilmaamo gaal iyo bidcoole.

Gudniinku wuxuu ahaa waajib, dabadeedna wuxuu noqday xaaraan. Bakhtiga markii hore waa la reebay, haddana waa la bannaystay. Sanamyadu waxay ahaayeen shirki, balse markii dambe waxaa loo aqoonsaday astaamo cibaado iyo dhawrsanaan. Guurka wadaaddadu markii hore wuu bannaanaa, dabadeedna waa la mamnuucay. Qaadashada hantida dadka raacsan masiixiyadda waxay ahayd arrin la canaanto, laakiin markii dambe canshuuraha kaniisaddu waxay noqdeen waajib khasab ah.

Arrimo kale oo badan ayay shirarkii kaniisaddu ka beddeleen xalaalnimo una rogeen xaaraan ama lidkeeda, iyagoo aan wax xujo ah ka haysan Alle (SWT), isla markaana aan u arkin arrintaas wax dhib ah.

Sidoo kale, kaniisaddu waxay ku dartay hal-xiraalihi saddex laha ahaa (saddexda Ilaah) caqiidooyin iyo fikrado kale oo caqliga saliimka ahi durba garanayo inaanay suuragal ahayn, hase yeeshee dadka waxaa lagu khasbay inay rumeeyaan aqbalaanna sharciyadda sida ay kaniisaddu dooneyso. Waxaa ka mid ahaa: caqiidada rootiga iyo khamriga ee cashada rabbaaniga ah (العشاء الربَّاني), caqiidada iskutallaabta (الصَّليب) (Saliibka waxaa la sheegaa in lagu xasuusanayo sida Nebi Ciise naftiisa ugu huray Bani'aadka). Quraanku wuxuu noo sheegay in daldalaadda Nebi Ciise ay been abuur tahay:

قال تعالى: {وَقَوْلِهِمْ إِنَّا قَتَلْنَا الْمَسِيحَ عِيسَى ابْنَ مَرْيَمَ رَسُولَ اللَّهِ وَمَا قَتَلُوهُ وَمَا صَلَبُوهُ وَلَكِنْ شُبِّهَ لَهُمْ وَإِنَّ الَّذِينَ اخْتَلَفُوا فِيهِ لَفِي شَكٍّ مِنْهُ مَا لَهُمْ بِهِ مِنْ عِلْمٍ إِلا اتِّبَاعَ الظَّنِّ وَمَا قَتَلُوهُ يَقِيناً بَلْ رَفَعَهُ اللَّهُ إِلَيْهِ وَكَانَ اللَّهُ عَزِيزاً حَكِيماً} النساء (157)

Dhammaan arrimahaas waxaa lagu waajibiyey dadka raacsan Masiixiyadda iyadoo loo cuskanayo hal dood oo keliya: in ay yihiin siro xagge sare ka yimi oo aan la oggolayn in laga doodo ama laga shakiyo saxnimadooda. Waxaana u fududeeyey in dadku ay aqbalaan khuraafaadkaas oo dhan iyadoo ay kaniisaddu sheegato inay dhammaan marjiciyadda diinta iyadu la keli tahay, cid Alle xiriir la yeelan kartaana aysan jirin iyadoon dariiqeeda soo marin.

Kaniisaddu waxay sii xoojisay awooddeedii gacan-ku-rimiska ahayd, iyada oo sheegatay xuquuqo Ilaahay gaar la yahay, sida xaqa dembi-dhaafka, xaqa ka saarista iyo cayrinta kaniisadda (excommunication), iyo xaqa ka qaadista ama beddelidda xukunnada diineed. Mana ay ka labalabayn inay xuquuqahaas adeegsato kana faa'iidaysato.

Xaqii dembi-dhaafku wuxuu horseeday dhacdooyin taariikheed oo fadeexad weyn noqday, halka xaqa cayrinta kaniisaddu uu ahaa ciqaab ruuxi ah oo aad u culus, taas oo cabsi iyo argagax ku haysay shakhsiyaadka iyo bulshooyinka labadaba.

Dadkii lagu fuliyey ciqaabtaas lama soo koobi karo; waxaa ka mid ahaa boqorro sida Frederick, Henry IV ee Jarmalka, iyo Henry III ee Ingiriiska. Sidoo kale waxaa ku jiray culimo diineed oo ka horyimid aragtida kaniisadda, laga soo bilaabo Arius ilaa Martin Luther, iyo aqoonyahanno iyo mufakiriin su'aalo geliyey ama dhaliilay aragtiyaha kaniisadda, sida Giordano Bruno, Ernest Renan, iyo kuwo kale oo badan.

## 2. XADGUDUBKA DHINACA SIYAASADDA

Waa arrin dabiici ah in culimada diintu ay saameyn iyo door siyaasadeed ku yeeshaan ummadda diintooda ku dhaqanta. Xaqiiqdii, waxa ugu habboon oo la filan karaa waa in hoggaanka arrimaha bulshada oo dhan — gaar ahaan siyaasadda — uu gacanta ugu jiro dad iimaan leh oo diintooda ku dhaqma, kuwaas oo hirgeliya shareecada Ilaahay kuna dabaqa nolosha dhabta ah.

Hase yeeshee, waxa aan marnaba la aqbali karin waa in culimada diintu isu beddelaan daalimiin iyo siyaasiyiin xirfad ka dhigta raadinta awoodda, iyaga oo dhinac iskaga tuuraya shareecada Ilaahay kana saaraya xisaabta nolosha, si ay booskeeda ugu beddelaan damac xad-dhaaf ah oo ay wehliso ku-takrifal awoodeed iyo xukun-jacayl.

Waxaa kaloon culays ka jirin in kaniisaddu toosiso khaladaadka boqorrada ama ku cadaadiso marka ay isku dayaan inay jebiyaan amarrada diinta oo ay ka tallaabaan xuduudaha Ilaahay dejiyey, si loogu soo celiyo jidka saxda ah ee diinta looguna hago cibaadada Eebbe keliya. Taasi waa waajibka ugu weyn ee saaran hay'ad diimeed kasta, mana habboona inay ka gaabiso ama ka tanaasusho.

Laakiin waxaa foolxumo ah; haddii kaniisaddu iyadu qayb ka noqoto baabi'inta diinta iyo curyaaminta shareecada, dabadeedna isu dhigto ilaaliye iyo kor-jooge ka sarreeya boqorrada iyo amiirrada, kuna khasabto inay si liidata ugu hoggaansamaan, iyadoo heerka wanaaggooda ku cabbiraysa hadba inta ay iyada u muujiyaan adeecid iyo u adeegid, halkii lagu qiimayn lahaa sida ay u dhowraan xuduudaha Ilaahay una raacaan manhajkiisa. Ficilka noocaas ah oo Kaniisaddu ku kacaysaana waa arrin fool xun oo fadeexad ah. Waxaase xaqiiqo taariikheed ah in dhacdooyinka aan soo sheegnay la diiwaangeliyey xilliyadii barwaaqosooranka ee Kaniisadda Masiixiga.

Waxa si cad ugu dhiirraday Edward I, boqorkii Ingiriiska, iyo Philip IV, boqorkii Faransiiska ee loo yaqaanay Philip the Fair, inay ku dhawaaqaan:

"Khasab ma aha in boqorku u hoggaansamo Baadariga si uu uga mid noqdo dadka Jannada geli doona aakhiro. Mid kasta oo ka mid ahna wuxuu go'aansaday inuu noqdo madaxa ugu sarreeya boqortooyadiisa, waxaana arrintaas si buuxda ugu taageersanaa shacabkiisa."

Si kastaba ha ahaatee; waxa ay boqorradani doonayeen ma ahayn inay burburiyaan kaniisadda ama ay ka baxaan caqiidadeeda iyo tacliinteeda diineed; balse waxa keliya oo ay rabeen in kaniisaddu joojiso faragelinta iyo kor-joogtaynta siyaasad ahaan iyo diin ahaanba ay dul dhigtay.

Hase yeeshee; boqorrada iyo Kaniisaddu war iskuma hayaan. Kaniisaddu waxay aaminsanayd in u hoggaansanaanta boqorradu aanay ahayn arrin ikhtiyaari ah oo ay iyagu dooran karaan, balse ay tahay waajib ka dhashay maqaamka diineed iyo awoodda ruuxiga ah ee ay sheeganayso. Arrintan waxaa si cad loogu muujiyey bayaan uu soo saaray Baadariga Nicholas I, kaas oo uu ku yiri:

***"Wiilka Ilaahay ayaa aasaasay kaniisadda, isaga oo Rasuul Butros I ka dhigay hoggaamiyihii ugu horreeyey. Baadariyaasha Roomana waxay si xiriir ah oo aan kala-go' lahayn u dhaxleen awoodihii Butros. Sidaa darteed, Baadarigu waa wakiilka Ilaahay ee dhulka korkiisa, waana inuu lahaadaa madaxtinimada ugu sarreysa iyo awoodda ugu weyn ee dhammaan Masiixiyiinta, ha noqdaan kuwo wax xukuma ama kuwo la xukumo."***

Hadalkan wuxuu muujinayaa aragtidii kaniisadda xilligaas, taas oo ku salaysnayd in awoodda ruuxiga ahi ka sarrayso awood kasta oo siyaasadeed, isla markaana boqorrada iyo madaxda dunidubа ay hoos imanayaan maamulka iyo hagidda Baadariga, waana midda reer Yurub ku bixisay inay diin oo dhan ka fogaadaan, Calmaaniyadna doortaan.

## 3. XAD-GUDUBKA MAALIYADEED EE KANIISADDA

Haddii aad indhaha mariso Injiillada Masiixiyadda, waxaa kuu caddaanaya sida ay uga digeen uruursiga maalka iyo hantida; iyagoo islamarkaana kuwa rumaysan nacsiinaya ku mashquulidda nolosha adduunka iyo quruxdeeda aan lagu waarayn.

Qof kasta oo si qoto dheer u akhriya Injiillada – inkasta oo isbeddel lagu sameeyey – wuxuu la dhacsanaan doonaa tusaalooyinka quruxda badan ee uu Nabi Ciise (NKH) ka bixiyey adduunka iyo raaxadiisa aan waartada ahayn. Sidoo kale, wuxuu si cad uga dheehan karaa noloshii Nebi Ciise iyo dhaqankiisii wax ku oolka ahaa inuu waafaqsanaa wacdiyadiisii iyo waanooyinkiisii qotada dheeraa.

Nebi Ciise iyo xertiisuba waxay ahaayeen dad cibaado badan oo ka fogaaday raaxada adduunka. Waxay si nacayb iyo quursi leh u eegayeen hantida badan iyo khasnadaha ay urursan jireen dadkii ay isku jinsiyadda ahaayeen ee Yuhuuddu.

Qarniyadii xigayse waxaa soo baxayay is-barbardhig yaab leh oo u dhexeeya aragtidii kaniisaddu ka qabtay adduunka iyo dhaqankeedii dhabta ahaa. Kaniisaddu waxay gaadhay heer ay adkaysay arrimaha diinta ilaa ay xaaraantimaysay waxyaabo badan oo Ilaahay xalaaleeyey oo ka mid ah nicmooyinka wanaagsan. Waxay sidoo kale qaadatay aragti u dhow tii Budiism-ka ee niyad-jabka ku dhisnayd, taas oo nolosha adduunka u aragta wax aan qiimo lahayn.

Hase yeeshee, dhinaca kale, taariikhda iyo dhaqanka kaniisadda lafteedu waxay noqdeen bog ceeb badan oo muujinaya sida ay ugu dhegganayd adduunka iyo jaqidda dhiigga taageerayaasheeda, uguna dedaalaysay urursiga maalka iyo hantida, si ka xeel-dheer hab-dhaqanka maalqabeennadii Yuhuudda iyo mulkiilayaashii waaweynaa ee nidaamka dhul-beereedka (feudalism-ka), kuwaas oo kaniisaddu ku tilmaami jirtay "dad adduunyo ku mashquulsan".

Halkaas waxaa ka muuqata farqiga weyn ee u dhexeeya dhaqanka kaniisadda iyo tacliintii Nabi Ciise (NNKH), kaas oo yidhi: "Geel inuu dhex maro daloolka irbadda ayaa ka fudud in nin maalqabeen ahi galo Boqortooyada Ilaahay."

Waxa kale oo uu xertiisii ku yidhi: "Ha urursanina dahab, qalin ama naxaas (Maar); ha qaadanina boorso safar, laba go' oo dhar ah, kabo dheeraad ah ama ul safar."

Hadalladani waxay si cad u muujinayaan baaqii Nebi Ciise ee ku wajahnaa fudaydka nolosha, ka-fogaanshaha hunguriga iyo maalka, iyo inaan qalbiga lagu xidhan quruxda iyo raaxada adduunka ee aan waarayn.

## SABABTA 2-AAD: LAGDANKA U DHEXEEYA KANIISADDA IYO CILMIGA

Khilaafka u dhexeeya diinta iyo saynisku waa mid ka mid ah dhibaatooyinka ugu qotada dheer uguna murugsan taariikhda fikirka Yurub, haddii aanu ahayn kan ugu qotada dheer dhammaantood. Laga soo bilaabo xilligii Dib-u-curashada Yurub (Renaissance) ilaa maanta, waxaa si joogto ah u socday loollan adag oo u dhexeeya taageerayaasha sayniska iyo kuwa difaaca diinta.

Inkastoo muuqaallada badan ee ka dhex muuqda nolosha reer Galbeedka ay tilmaamayaan in dagaalkaasi dhammaaday – siday ayagu u arkayeen-, sayniskuna guul kama dambays ah ka gaaray cadowgiisii weynaa oo loola jeedo diinta, haddana waxaa jira caddeymo xooggan oo muujinaya in diintu – ama si gaar ah qaar ka mid ah arrimaheeda caqiidada iyo akhlaaqda la xidhiidha – aanay weligeed helin doodda iyo awoodda ay maanta leedahay oo kale.

Dad aad u yar ayaa garwaaqsaday sirta ka dambaysa sababta uu murankani u sii socdo, iyadoo aan la gaarin natiijo kama dambays ah oo dhinac keliya guul u horseedda. Xaqiiqadu waxay tahay in sababta dhabta ah si fudud loo fahmi karo haddii qofka reer Galbeedku – dhinac kasta oo uu ka tirsan yahayba – ka tago kibirka iyo isku-kalsoonaanta xad-dhaafka ah, una eego arrintan si dhex-dhexaad ah oo caddaalad ku dhisan. Sababtu waxay tahay in laba dhinac oo iska soo horjeeda, mid kastana uu haysto nus ka mid ah xaqiiqada, aanay suurtagal ahayn in midkood kan kale kaga adkaado guul dhamaystiran oo kama dambays ah.

Marka aynu mabda'an fudud ku dabaqno khilaafka u dhexeeya sayniska iyo diinta Yurub, waxaynu ogaanaynaa in goobihii uu saynisku kala wareegay saamayntii diintu ku lahayd ay ahaayeen goobihii ay caqliga iyo xaqiiqadu kaga adkaadeen khuraafaadka iyo mala-awaalka. Sidoo kale, goobihii ay diintu ku adkaysatay oo ay kaga hortagtay weerarkii xoogga badnaa ee sayniska waxay ahaayeen goobihii ay runta Eebbe soo dejiyey kaga guulaysatay malo-awaalka iyo raacista hawada nafta.

Intii ay arrimahani socdeen, waxaa dhacay Dagaalladii Saliibiyiinta ee u dhexeeyey Muslimiinta iyo reer Yurub, kuwaas oo socday qarniyadii 11-aad iyo 12-aad ee miilaadiga. Intii lagu jiray dagaalladaas, Saliibiyiintu waxay si dhow ula kulmeen Muslimiinta, waxayna indhahooda ku arkeen wanaagga iyo horumarka Islaamka ee dhinacyada cilmiga, fanka iyo ilbaxnimada. Taas waxay ka muuqanaysay Andalus, Waqooyiga Afrika, Sicily iyo meelo kale oo badan oo dunida Islaamka ka tirsan.

Waddamada Muslimiinta waxaa ku baahsanaa dugsiyo iyo jaamacado tiro badan, kuwaas oo ay u soo waxbarasho doonan jireen ardayda cilmiga doonaysa, waxaana ka mid ahaa reer Yurubtii u timid inay wax ka bartaan culimada iyo macallimiinta Muslimiinta. Sidoo kale, qaar ka mid ah kutubta cilmiga ayaa loo turjumay afafka Yurub.

Markii ay dib ugu noqdeen dalkoodii, reer Yurubkii ay saameynta ku yeelatay iftiinka aqoonta Islaamku, waxay garteen in kaniisadda iyo wadaaddadeedu aanay ahayn sida ay isu muujiyeen, balse ay noqdeen aalad lagu marin habaabiyo dadka laguna xukumo si dulmi ah. Sidaas darteed waxay bilaabeen inay ka horyimaadaan kaniisadda iyo waxa ay u arkayeen diin la khalday, iyagoo soo bandhigay daahfurro cilmiyaysan, juqraafiyeed iyo kuwo la xiriira cilmiga dabiiciga ah, kuwaas oo kaniisaddu mamnuucday.

Markaas ayaa waxaa cirka isku shareeray colaaddii u dhexaysay culimada iyo wadaaddada kaniisadda. Kaniisaddu waxay bilowday inay gaaleysiiso, xirto, disho, gubto ama masaafuriso dadka sameeya daahfurka iyo hal-abuurka cilmiga. Waxa kale oo ay dhistay maxkamado baaritaan (Inquisition) si ay ula socoto ugana hortagto dadka faafinaya fikrado ka duwan aragtideeda.

Khilaafkan ayaa socday qarniyo badan, ugu dambayntiina wuxuu ku dhammaaday in kaniisadda iyo wadaaddadeeda laga fogeeyo faragelinta arrimaha nolosha iyo maamulka dawladda. Sidaas darteed, diinta — marka loo eego aragtidan — waxaa lagu koobay gudaha kaniisadda oo keliya, iyadoo loo arkay inaan loo baahnayn inay saameyn ku yeelato arrimaha bulshada iyo dawladda. Maamulka nolosha iyo hawlaha dawladdana waxaa loo daayay siyaasiyiinta iyo aqoonyahannada, iyaga oo u maamulaya sida ay u arkaan inay ku habboon tahay, ha waafaqsanaato mabaadi'da diinta ama yaanay waafaqsanayn.

Maaddaama diintu, iyadoo ah qaabkeedii rabbaaniga ahaa ee daahirka ahaa, aanay gelin dagaalkan, waxaa habboon in wixii Galbeedka ka dhacay loogu yeero 'khilaafkii u dhexeeyey Kaniisadda iyo Sayniska', halkii loogu yeeri lahaa

'khilaafkii u dhexeeyey Diinta iyo Sayniska'. Sababtu waxay tahay in waxa si toos ah isu hor taagnaa aanu ahayn diinta asalka ah ee Eebbe soo dejiyey iyo sayniska, balse uu ahaa hay'adda kaniisadda iyo aragtideedii ku aaddanayd aqoonta iyo nolosha

Sidaa darteed, inkasta oo dad badani u maleeyeen in saynisku gebi ahaanba meesha ka saaray doorkii diinta, haddana doodaha la xiriira caqiidada, qiyamka, iyo macnaha nolosha ayaa dib u helay miisaan iyo muhiimad weyn, taas oo muujinaysa in xiriirka u dhexeeya diinta iyo saynisku uu weli yahay mawduuc furan oo aan si buuxda loo soo afjarin.

## SABABTA 3-AAD: KACAANKII FARANSIISKA

Sababo la xiriira xaaladdii kaniisadda iyo diintii la leexiyey ee ay matalaysay, iyo sida ay uga hor timid rabitaannada iyo danaha shacabka, Yuhuuddu waxay maleegeen qorshayaal iyo xeelado ay uga faa'iidaysanayaan kacdoonkii maskaxeed iyo niyadeed ee ku sii xoogaysanayey bulshooyinka Yurub, gaar ahaan shacabka Faransiiska. Sidaas awgeed, waxay diyaariyeen qorshayaal lagu abuurayo Kacaankii Faransiiska, kaas oo lagu doonayey in lagu beddelo nidaamyadii markaas jiray, iyadoo mudnaanta koowaad la siinayo in diinta Masiixiga ee la beddelay laga saaro saamaynta ay ku lahayd nolosha bulshada, laguna koobo gudaha kaniisadaha, isla markaana laga joojiyo wadaaddada awooddii dulmiga ahayd ee ay dadka ku maamuli jireen.

Sannadkii 1789-kii ayaa dhab ahaantii kacaankii weynaa qarxay. Waxaa hubaal ah in Yuhuuddu ay gurteen faa'iidooyinkii iyo mirihii ka dhashay dadaalladoodii, halka bulshooyinku ay bixiyeen qiimaha dhibaatada, xanuunka iyo dhiigga ku daatay kacaankaas. Waxay kaloo ku guulaysteen inay ka shaqeeyaan meel ka baxsan iftiinka iyo indhaha dadweynaha, isla markaana ay qariyaan ama beddelaan xaqiiqooyin badan oo taariikheed si ay u daboolaan xeeladahooda iyo ujeeddooyinkooda.

Sidoo kale, waxay ku guulaysteen inay kacaankaas iyo wixii ka dhashay u sawiraan si qurux badan oo soo jiidasho leh, ugana dhigaan dhacdo taariikheed oo sharaf iyo maamuus weyn leh. Taasna, waxaa lagu gaaray dacaayado si xeeladaysan loo qurxiyey, warar iyo hal-ku-dhegyo dhalaalaya oo bulshada soo jiitay, kuwaas oo dad badani ku celceliyeen iyaga oo aan si qoto dheer u fahmin himilada iyo ujeeddada dhabta ah ee ay xambaarsanaayeen.

## GUNAANAD:

Xad-gudubyadii ay kaniisaddii Yurub ku kacday dhinacyada diinta, siyaasadda iyo dhaqaalaha waxay horseedeen kacdoon bulsho iyo fikir oo si weyn u saameeyay taariikhda reer Galbeedka. Kacdoonkaas ayaa ugu dambayn dhaliyay soo bixitaanka mabda'a Calmaaniyadda, kaas oo ku salaysnaa kala saaridda diinta iyo arrimaha nolosha guud, gaar ahaan maamulka iyo siyaasadda. Si kastaba ha ahaatee, waayo-aragnimadaas taariikhiga ah waxay ku koobnayd xaaladdii gaarka ahayd ee Yurub iyo xiriirkii u dhexeeyay kaniisadda iyo bulshada xilligaas.

Dhanka kale, qaar ka mid ah aqoonyahannada Muslimiinta ayaa qaatay aragtidaas iyaga oo isku dayay inay ku dabaqaan dunida Islaamka, kuna dooday in diintu aysan door ku lahayn maamulka dawladda, siyaasadda iyo habaynta nolosha bulshada. Hase yeeshee, dooddaasi waxay weli ka mid tahay mawduucyada ugu muranka badan ee fikirka Islaamka casriga ah, maadaama Islaamku yahay diin hagta dhammaan dhinacyada nolosha, kana kooban nidaamyo anshax, bulsho, dhaqaale iyo siyaasadeed oo isku dhafan.

Sidaa awgeed, fahamka xiriirka ka dhexeeya diinta iyo nolosha bulshada wuxuu u baahan yahay daraasad qoto dheer oo ku salaysan xaqiiqooyinka taariikhiga ah, mabaadi'da diimeed iyo duruufaha bulshada, si looga fogaado in waayo-aragnimo gaar ah oo ka dhacday meel iyo waqti cayiman si guud loogu dabaqo bulshooyin iyo diimo kale oo leh asal iyo aragti ka duwan.

**Tixraac:**


1. العلمانية وموقف الإسلام منها: د. حمود بن أحمد الرحيلي
2. العلمانية نشأتها وتطورها في الحياة الإسلامية المعاصرة: تأليف الدكتور/ سفر بن عبد الرحمن الحوالي، مطبوعات مركز البحث العلمي وإحياء التراث الإسلامي
3. المسيحية:د. أحمد شلبي، مكتبة النهضة المصرية، القاهرة
4. الكشاف الفريد عن معاول الهدم ونقائض التوحيد لخالد محمد علي الحاج، دولة قطر، 1983م.
5. كتاب المقدس: دار الكتاب المقدس في الشرق الأوسط.

# SIRIQDA SIYAASADDA SOOMAALIYA



Maxamed Xasan Cirro




**Xigashada Sawirka**: AI

Hannaanka horusocod ee dowlad-dhiska Soomaaliya ayaa la kulmaya hagardaamo iyo curyaamin joogto ah oo ka imanaysa aragti ku qotonta kursi jacaylka, culaysyadu waxay ka imanayaan aragtiyo is diidan oo salka ku haya arrimo aan kala soocnayn, isuguse biyo shubanaya damaca xukun jacayl, musuq, qabiilaysi iyo xatooyo.

Dastuurka ku-meel-gaarka ah ee dowladdu wuxuu dhigayaa in afartii sano kasta dalku galo doorasho baarlamaan iyo madaxtooyo, iyadoo lagu jaan goynayo wakhtiga sharci ee loo dejiyey muddo xileedka hay'adaha dowladda.

Bedelkeedse; tan iyo intii la soo dhisay dowladda federaalka sanadkii 2004-tii, waxaa dalka soo maray shan madaxweyne, ma jirto hal mid oo muddo xileedkii loogu talagalay hay'adihii dawladda ee xukunka joogay ay wakhtiga dastuurku dhigayo ku qabteen doorasho iyo maarayn wanaagsan oo ay dalka kaga gudbiyeen wakhtiga kala guurka. Bedelkeedna waxaa dalku galaa firaaq dastuuri ah, muranno siyaasadeed iyo isku dhacyo hubaysan oo khatar geliya jiritaanka dowladda, xoqqana utuno qabiil oo ah raran hoosta ka nool oo siyaasadda Soomaaliya ka dul dhisan tahay.

Qormadaan waxan ku eegaynaa, maxaa sababa dib u dhaca iyo is haysiga sharci ee muddo xilleedka dowladda.

## HALKEE WAX KA KHALDAN YIHIIN?

Nidaamka siyaasadeed ee dalka waa federaal, waxaana xubnaha Baarlamaanku ku yimaadaan habka 4.5 ee ku dhisan saamiga beelaha Soomaaliyeed. Habka lagu soo xulo xildhibaannada ayaa ah kan go'aamiya jihada siyaasadda dalka. Haddii uusan jirin hannaan doorasho oo cad, hufan, isla markaana ay dhammaan dhinacyada siyaasadda ku lug leh ku kalsoon yihiin, waxaa loo arkaa qorshe lagu shubtay oo ay dejisay dowladda talada haysa. Is-afgarad la'aanta ku saabsan habka doorashada ayaa ah sababta ugu weyn ee keenta dib u dhaca, muranka siyaasadeed, iyo is-qabqabsiga soo noqnoqda marka uu dhammaado muddo-xileedka dowladda.

Wakhtigii rasmiga ahaa ee hay'adaha dastuuriga ah ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ee hadda talada haysa wuxuu ku ekaa 15-kii May 2026. Si kastaba ha ahaatee, hoggaanka dowladda ayaa ku fashilmay muddadii afarta sano ahayd ee ay xilka hayeen inay dalka u dejiyaan hannaan siyaasadeed oo la isku raacsan yahay, laguna qabto doorasho ku dhacda wakhtigeedii dastuuriga ahaa.

Dowladda uu Madaxweynaha ka yahay Xasan Shiikh Maxamuud waxay dhistay guddi doorasho oo ay iyadu magacowday xubnihiisa, kuwaas oo ku yimid rabitaankeeda siyaasadeed. Guddigaas ayaa waxaa qaadacay inta badan dhinacyada siyaasadda ee mucaaradka ah, kuwaas oo su'aal geliyay madaxbannaanidiisa iyo hufnaanta habkii lagu soo dhisay.

Dhismaha guddi doorasho oo la isku raacsan yahay waa tiirka koowaad ee lagu abuuro kalsoonida nooca doorasho ee la gelayo. In guddiga ay dowladdu dhistay uusan lahayn karti, madaxbannaani iyo hufnaan uu ku qabto doorasho xalaal ah, waxaa caddayn ugu filan labadii doorasho ee ay maamuleen ee golayaasha deegaanka gobolka Banaadir iyo doorashadii maamul-goboleedka Koonfur Galbeed. Labadaas doorasho waxaa hareeyay eedeymo la xiriira hufnaan la'aan, iyadoo xitaa ka hor inta aysan doorashadu dhicin la sii shaacin jiray qofka ku soo baxaya kursi kasta. Taasina waxay sii wiiqday kalsoonidii lagu qabay geeddi-socodka doorashada iyo madax-bannaanida guddiga.

Tani waa caddeynta rasmiga ah ee qaab-fekerka madaxda dalka, oo wax kasta u wajahaya sidii ay awoodda ugu ururin lahaayeen gacantooda. Si ay taas u xaqiijiyaanna, waxay ku dadaalaan inay jideeyaan hannaan doorasho oo ay hubaan natiijada ka soo bixi doonta, iyagoo og cidda ku dhawaaqaysa natiijada iyo qofka haya qalinka lagu tirinayo codadka ka soo baxa doorashada ay sameysteen. Waa sababta ugu weyn ee mar kasta loo waayo wakhti go'an oo doorashadu ku dhacdo, waana furaha muranka iyo is-haysiga siyaasadeed ee dalka geliya khilaaf joogto ah, mararka qaarkoodna sababa amni-darro iyo dagaallo.

Marka laga soo tago damaca cidda xukunka haysa, aragtidan ku dhisan doonista gurracan ee awood ururisigu waxay dhabarka ka jebisay rajadii dowlad-dhiska Soomaaliya. Waxay fogeysay wakhtigii dalka uu ka soo kaban lahaa dhibaatooyinkii iyo dakharradii dagaalladii sokeeye, waxayna sidoo

kale wiiqday niyaddii wanaagsanayd ee dhinacyada taageeraya dib-u-dhiska iyo horumarinta Soomaaliya.

## XAGGEE XAALKU MARAYAA?

Golaha Mustaqbalka Soomaaliya, oo ay ku mideysan yihiin siyaasiyiin iyo qaar ka mid ah maamul-goboleedyada dalka, ayaa ah awoodda siyaasadeed ee ugu weyn ee hadda ka soo horjeedda dowladda uu hoggaamiyo Xasan Shiikh Maxamuud. Isku-dhacyadii hubaysnaa ee ka dhacay Muqdisho bilowgii bishan ayaa furay albaabbo cusub oo muujinaya sida Soomaaliya weli ugu nugushahay qalalaasaha siyaasadeed, isla markaana khilaafaadka siyaasadeed ay si degdeg ah ugu rogi karaan gacan-ka-hadal iyo amni-darro marka la waayo hannaan lagu xalliyo murannada jira.

Walaaca bulshada caalamka, oo waqti iyo dhaqaale badan gelisay geeddi-socodka dowlad-dhiska Soomaaliya, ayaa keenay inay si toos ah uga falceliso xaaladda taagan. Waxaa hadda socda dadaallo ay hormuud u tahay dowladda Turki, kuwaas oo ay garab ka siinayaan dalalka daneeya arrimaha Soomaaliya. Turkigu wuxuu qaaday tallaabooyin siyaasadeed oo lagu ururinayo xogta ku saabsan saldhigga khilaafka iyo aragtiyaha kala duwan ee dhinacyada ku lugta leh. Waxaa sidoo kale jira xubno ka tirsan mucaaradka oo safarro wada-tashi ah ku tegaya magaalada Istanbul. Wararka soo baxaya waxay sheegayaan inuu jiro qorshe ku dhow gabagabo oo ay dhinacyadu si guud u aqbaleen. Qorshahaas waxaa ka mid ah dhismaha guddi farsamo oo ay dowladda iyo mucaaradku ka kala tirsan yihiin xubno, kuwaas oo ka wada shaqayn doona diyaarinta hannaan doorasho oo la isku raacsan yahay.

Haddii qorshahaasi hirgalo, wuxuu noqon karaa tallaabo muhiim ah oo lagu yareeyo xiisadda siyaasadeed, laguna abuuro jawi ay dhinacyadu ku gaari karaan is-afgarad. Xilligan, waa rajada keliya ee ay indhaha ku hayaan inta badan daneeyayaasha siyaasadda Soomaaliya.

## XALKA MUXUU YAHAY?

Muddadii ay soo dhisnayd Dowladda Federaalka Soomaaliya, waxaa dalka ka dhacay doorashooyin kala nooc ah. Dhammaantoodna waxay lahaayeen dhibaatooyin iyo caqabado sababay utuno, kala shaki iyo is-nac siyaasadeed. Mar kasta awoodda siyaasadeed waxay inta badan ku urursanayd gacanta kooxo gaar ah, halka ay jireen dhinacyo kale oo doorashada danaynayay balse ka maqnaa talada iyo go'aan qaadashada, kuwaas oo u arkayay in lagu tuntay xuquuqdoodii siyaasadeed.

Taariikhdaas iyo waaya-aragnimada laga dhaxlay doorashooyinkii hore waxay reebeen casharro muhiim ah oo qof kasta oo siyaasadda danaynayaa maskaxda ku hayo. Waa casharro muujinaya in aan la heli karin xasillooni siyaasadeed iyo aqbalaad doorasho haddii aan la helin hannaan loo dhan yahay oo dhinacyadu ku wada kalsoon yihiin.

Tusaale ahaan, doorashadii ugu dambaysay ee dhacday 2021–2022, awoodda go'aan gaarista doorashadu waxay gacanta u gashay madaxda maamul-goboleedyada. Habkii ay wax u maamuleenna wuxuu abuuray kalsooni darro iyo shaki weyn, taas oo bulshada Soomaaliyeed ku keentay niyad-jab ku saabsan hannaankii dowlad-dhiska. Waxay sidoo kale sii kala fogeysay shacabka iyo madaxda maamullada. Maanta waxaa jira dadaallo is barbar socda oo looga hortagayo in mar kale lagu noqdo nidaamkii doorasho ee lagu soo doortay hay'adaha dastuuriga ah ee waqtigoodu dhammaaday.

Si tan la mid ah madaxtooyadu, marka la eego siday u maamushay doorashadii ay ka qabatay maamulka Koonfur Galbeed iyo golihii deegaanka gobolka Banaadir. Doorashooyinkan ay qabatay waxay faydeen ceebaha iyo damaca gurracan ee madaxtooyadu ku doonayso in doorashada ka hor ay sii astayso qofka ay xilka u wadato, oo ah qof ay iyadu u aragto in uu yahay kan kursiga ku sii hayn kara.

Waxay tani si cad u muujinaysaa in aan lagu qabi karin kalsooni masuuliyadeed ay arrinta is-mariwaaga doorashada keligeed xal uga gaarto. Xalka looga gudbi karo dhibaatada ragaadisay dowlad-dhiska Soomaaliya ee mar kasta soo noqnoqota waa in xal waara loo helo hannaanka doorashada dalka. Xalkaasna wuxuu noqon karaa mid ka mid ah laba arrimood.

In guddiyada doorashada qabanaya ay ka yimaadaan bulshada Soomaaliyeed, lagana fogeeyo siyaasiyiinta inay lug ku yeeshaan, laguna soo xulo karti, hufnaan iyo aaminaad lagu qabi karo garsoorkooda. Qodobka kale waa in qabaa'ilka iska leh kuraasta loo celiyo xaqa soo xulista xubnahooda. Iyagu ha shiraan, ha isugu tagaan deegaannadooda, dhexdoodana ha iska qancaan, kana soo dhex saaraan xubintii kursiga u meteli lahayd. Geeddi-socodkaasna waxaa hoggaaminaya isimada dhaqanka, cuqaasha, ganacsatada, culimada iyo qaybaha kala duwan ee bulshada.

Labadan talo waxay meesha ka saarayaan saamayntii siyaasiyiintu ku lahaayeen xulista xildhibaannada. Waxay sidoo kale kor u qaadaysaa kalsoonida ay shacabka Soomaaliyeed ku qabaan geeddi-socodka dowlad-dhiska, waxaana hubaal ah in hoggaan ay dadku aamini karaan uu ka soo bixi karo tubtaas.



# MAARSHAALKA GARASHADA



Maxamed Cali Adan (Hoorri)



Maansadani, waxa ay soo baxday 2024-kii, waxa ayna maamuus iyo sharfid u ahayd xeeldheere Cabdalla Cumar Mnasuur. Marka qof laga qorayo sooyaalkiisa iyo taariikh-nololeedda uu soo joogey ma aha arrin fudud. Waxa hubaal ah in howshaasi tahay mid mudnaanteeda leh una baahantahay qalab-qaadasho iyo ka mira-dhalin waarta. Sidoo kale, waxa ay ka mid tahay wadiiqooyinka lagu kaydin karo taariikhda qofka (biography), waxtarkiisa, heerarka noloshiisa kala duwan, waxbarashadiisa iyo dhammaan wixii la xiriira oo ah xirfado, khibrado, safarro, wax-soosaar iyo waaya-agarnimo la taaban karo. Waxa jira inta ogaalkayga ah buug laga qoray sooyaalka Prof. Mansuur oo uu qalinkan qaatay jaalle Bilaal Qaasim Fiqi (Aaka, waa hubaal inuu kitaabkaasi yahay mus-dambeed laga dhimbiilqaadan karo, lagana dheehan karo shakhsiyadda buuni Maansuur iyo waxqabadkiisa dahabiga ah.

Maxay ka dhigantahay in Madaxweynaha (JFS) Dr. Xasan Shiikh Maxamuud uu billadsharaf heer qaran ah u guddoonsiiyay Prof. Cabdalla Cumar Mansuur iyo Prof. Annarita Puglielli? Waxa ay ka dhigantahay Milgaynta iyo xurmaynta qalinka, tixgelinta garhayaha aqoonta, ilaalinta naftiihuraha cilmibaarista, bidhaaminta gudashada iyo garashada daljirka, muujinta hormuudka iyo foolaadka danjiraha qalinka iyo qoraalka ummadda Soomaaliyeed.

Xeeldheere Cabdalla Cumar Mansuur iyo Xurmo Prof. Annarita waxay astaan u yihiin joogtaynta ka-maridhalinta cilmibaarista. Marka aad dheehato dhambaallada taariikhda iyo galalka ummadaha kale, waxaad ogaanaysaa qiimaha iyo qaayaha ay leedahay in wax laga dhaado, laga gunto, laga weeleeyo, laga xigto, laga ururiyo geeddi-socodkooda aqooneed iyo sahankooda ku qotoma waaya-aragnimada iyo dun-wanaagga qofnimo.

Shirka lagu maamuusay labada khabiir waxa uu ahaa Shirkii Cilmibaarista & Daaraasaadka Soomaalida oo ay iska kaashadeen Wasaaradda waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare , Ururka Caalamiga ah ee Daraasaadka Soomaaliya — Somali Studies International Association – (SSIA) iyo Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed oo ka qabsoomay caasummadda dalka- Muqdisho hilaaddii bishii December 2024-kii.

Xeeldheere Cabdalla Cumar Mansuur waxa uu astaan u yahay dadnimada iyo kartida qofka Soomaaliga ah. Bulsho kasta oo gaarta tanaad iyo tisqaad nololeed ogow waa bulsho tixgelisa baraheeda. Dhanka kale, bulsho kasta oo hoos uga dhacda dhabbaha guusha iyo hayaanka, kuna hoos noqota burburkeeda, ogow waa bulsho bahdisha baraheeda ama aan maamuusin. Haddaba, waxa hubaal in in uu macallinku yahay halbowlaha haba kanaallada qaada aqoonta iyo cilmiga, waxa bila, qurxiya, dheeha, kobciya garaadka iyo kasiista kasmada qofka. Macallinku waxa uu mudan yahay maqaam iyo kaalin lagu aslay karaamo iyo tixgelin bulsheed—ujeedkaygu waa in aan noqonno qaran qiimayn kara waxa uu gudo ama gooyo macallinka Soomaaliyeed. Haddii aan qeyb ka mid ah waxqabadkiisa ina xusuusiyo waxa ka mid ah:

1. Bahda Afafka Kushiitigga iyo Taariikhda af Soomaaliga,
2. Astaamaha Guud ee Maansada Soomaaliyeed.
3. Diiwaanka Ereybixnta Af Soomaaliga (1) (Ereybixinta Maamulka & Afka)—Mansuur (diyaarin & ururin).
4. Diiwaanka Ereybixinta Af Soomaaliga (2) (Ereybixinta Cilmiga)—Mansuur (diyaarin & ururin).
5. Diiwaanka Ereybixinta af Soomaaliga (3) (Ereybixinta Farsamada & Culuunta)—Mansuur (diyaarin & ururin), Le Lingue Cuscitiche e il Somalo (8), La Storia della Religione Tradizionale del Cusciti (The History of the Cushitic Traditional Religion).
6. Taariikhda Afka & Bulshada Soomaaliyeed.
7. Habdhigaalka af Soomaaliga Guud—Midayn, Horumarin & Casriyayn.
8. Barashada Naxwaha af Soomaaliga — Mansuur & Annarita Puglielli.
9. Qaamuuska af Soomaaliga —Mansuur & Annarita Puglielli.
10. Qaamuuska Dugsiyada af Soomaaliga—Mansuur & Annarita Puglielli.
11. Seeska Naxwaha af Soomaaliga—Mansuur & Idiris M. Cali.

Afka mirifrirkiisiyo
Buuni weeye Mansuur
Mahwi weeye aan gurin
Mufti weeye gaammurey
Muqni weeye kaafiya
Muguc weeye shaafi ah
Mad-hab weeye teeri ah.

Qaamuuska madiga ah
Ereyada magowsaday
Makaabkiisu adag yahay
Milayguu u sarakacay
Mar hadduu innoo qoray
Mintid weeye gudasho leh
Marna waa maddaaliyo
Maarshaalka garashada!

Moorada naxwaha guud
Magaciyo falkaabyada
Meelaynta weedhaha
Maaraynta qurubyada
Iyo magacuyaallada
Waa maqaddamkeedoo
Qofna kuma masuugoo
Kuma furo masaladaha
Muran iyo akeekamid.

Marna hirarka gabayguu
Milaalaa mudhbixiyaa
Marsadiisa joogaa
Miisaan gorfaynliyo
Mahadhooyin curiyaa
Muhashada aqoontuu
Marsinkeeda keenaa
Madal loo hiloobuu
Maageer u waabaa.

Waa musbaax hanuunoo
Mugdi lagaga guuroo
Mowjadaha ogaalkuu
Marjiceeda noo yahay
Maaraynta xarafkana
Marmaroor hadduu galo
Midayn laysu weriyiyo
Masdarkeeda weeyaan.

Taariikhda moolka ah
Maalmaha silsaladda ah
Maansadeenna Soomaal
Miiddiyo macaanka leh
Madxaf laga gunnaystiyo
Musdanbeedka weeyoo
Maankiyo garaadkuu
Misciliil u yahay adag.

Taariikhda moolka ah
Maalmaha silsaladda ah
Maansadeenna Soomaal
Miiddiyo macaanka leh
Madxaf laga gunnaystiyo
Musdanbeedka weeyoo
Maankiyo garaadkuu
Misciliil u yahay adag.

Yaa Suqurka hoosiyo
Sararaha Gadoobkiyo
Marinnadii Sanaag iyo
Halkii saantu kuu tiil
Doqon sarara-weynoow
Subax yaa ka sarakaca?

Siinkaygu wuxu yahay;
Sabadii Caleed iyo
Gurigii Siraadnaa
Suunnaari hogan jirey
Siirada wadaadkiyo
Sirta lagu cirbixin jirey
Socotada daryeel iyo
Soohan loogu qali jirey
Marna dhiilo saabliyo
Sibraar caano geelana
Sooryo looga dhigi jirey
Doqon sarara-weynoow
Saaka yaa atoor ka ah?
Siinkaygu wuxu yahay;
Saddex baan ku dhaartaye
Yaa Xubeera kaa siray?
Laasqoray ka salowdeye
Sebenkaa madowga leh
Kumaa sahanka loo diray?

Saxaraha-lamood iyo
Baradaad ku sugan tahy
Ma su'aal gingiban baa?
Ninna aanu sixi karin?

Yaa saqaafka kuu qoray?
Yaa saboolka kaa dhigay?
Sahaydaada yaa qubay?
Soortaada yaa wada?
Saanadi ha joogtee
Doqon sarara-weynoow
Dunidee ku sugan tahay?

Siinkaygu wuxu yahay;
Waa seben colaad iyo
Siidhi laysku yeershee
Horta soor ma leedahay?
Maxaa saanad wadataa?
Sangehee ku joogtaa?
Salabkiisu buuxaa?
Hub maxaa ka sidataa?

Siinkaygu wuxu yahay;
Ninka saraf-sanaayow
Kolna sacabsanaayow
Subkadow hurdaayow
Markaa suuqa joogtaan
Sinta bidix ma sayrtaa?
Socod dumar ma leedahay?
Sacaadada adduunkana
Doqon sarara-weynoow

Sifir miyaa ka joogtaa?
































**Website**: https://maragnews.com/

**Email**: editor@maragnews.com

MAJALADDA
MARAG